

مسيرات استهان بها الناس

يجب العذر منها

WAXYAALO ILAAHAY XARIMAY
DADKUNA FUDUDAYSTAY IN LA
ISAGA DIGANA AY WAAJIB TAHAY

WAXAA QOREY AL SHEEKH: MAXAMED ALMUNAJID

WAXAA AF-SOOMAALI U TARJUMAY
YUUSUF CABDUL CASIIS MAXAMED

محرمات استهان بها الناس
باللغة الصومالي

WAXYAALO ILAAHAY XARIMAY
DADKUNA FUDUDAYSTAY IN LA
ISAGA DIGANA AY WAAJIB TAHAY

WAXAA NAQTIIMAY OO SHARXAY
AL-SHEEKH C/SIIS C/LAAHI BIN BAAZ

WAXAA QOREY AL SHEEKH:MAXAMED AL
MUNAJID

WAXAA AF-SOOMAALI U TARJUMAY
YUUSUF CABDUL CASIIS MAXAMED

WAXAA AF -SOOMAALIGA TARJUMIDIISA NAQTIIMEY
C/MUNCIM YUSUF SHEEKH

HORUDHAC

Ilaahay ayaa mahad leh isaga ayaan Ku shukriyeynaa, oo kaalmaysanaynaa, oo dambi dhaaf weydiisanaynaa, Ilaahay ayaan ka magan galaynaa nafteena sharteeda iyo acmaasheena xun. Qofkii Ilaahay hanuuniyo cidna ma baadiyeyn karto, qofkii Ilaahay baadiyeeyana cidna ma hanuunin karto. Waxaan markhaati ka ahay Ilaahay mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudo in uusan jirin, waxaan kaloo markhaati ka ahay Nabi Muxamed (scw) adoonkii Ilaahay iyo rasuulkiisii inuu yahay intaa kadib:

Ilaahay wuxuu waajibiyey waxyaalo waajib ah oo aysan banaaneyn in la dayaco, wuxuuna jeexay xuduud aysan banaaneyn in la dhaafo Nabigu wuxuu yiri:

(ما أخل الله في كتابه فهو حلال، وما حرمه فهو حرام
وما سكت عنه فهو عافية فاقبلوا من الله العافية، فإن الله
لم يكن نسيا ثم تلا هذه الآية (وما كان ربك نسيا) رواه
الحاكم.

Waxyaalaha Ilaahay xarimay iyaga ayaa ah xuduuda Ilaahay

(تلك حدود الله فلا تقربوها) البقرة . ١٨٧

Ilaahayna wuu u goodiyey qofkii xuduudiisa dhaafa oo wuxuu xarimay sameeya Ilaahay wuxuu yiri:

(ومن يعصى الله ورسوله ويتعد حدوده يدخله ناراً خالداً فيها وله عذاب مهين) النساء ١٤.

Muxaramaadka in laga fogaado waa waajib waayo Nabigu Wuxuu yiri:

(ما نهيتكم عنه فاجتنبوه وما أمرتكم به فافعلوا منه ما استطعتم) رواه مسلم.

Waxaa la arkay dadka hawadooda raaca qaarkood oo aan dadnimo fiican lahayn cilmigooduna yar yahay, haddii ay maqlaan muxaramaadka oo isdabajoog loo taxayo inay ka qaylinayaan oo ka afeefanayaan oo oranayaan: Wax walba ma xaaraan baa? wixii aad aragtaanba waad xaaraantinimayneysaan, nolosha ayaad noo baaseyseen oo waad nanacsiiseen cayshaddii oo qalbiga ayaad naga ciriirideen. Xaaraan iyo waxaad xaaraantinimaysaan mooyee wax kale ma haysaan, diintu waa fudeyd waana waasic, Ilaahayna waa Qafuuru Raxiim. Si aanu kuwaas ula doodno ayaan waxaan leenahay Ilaahey wuxuu doono ayuu xukumaa, wuxuu xukumana lagama doodi karo, Ilaahayna waa xakiim khabiir ah, wuxuu doono ayuu xalaaleeyaa wuxuu doonana wuu xarimaa,

cibaadada aan Ilaahay caabudeyno waxaa aasaaskeeda ka mid ah inaan raali ku noqono wuxuu xukmiyo, Xukunka Ilaahayna wuxuu ka soo fulay cilmigiisa, xikmadiisa iyo caddaaladdiisa ee cayaar iyo dheeldheel ma aha. Ilaahay wuxuu yiri:

(وتمت كلمة ربك صدقا وعدلا لا مبدل لكلماته وهو السميع العليم) الأنعام ١١٧.

Ilaahay wuxuu inoo caddeeyey xeerka ay ku wareegayaan xalaasha iyo xaaraantu oo wuxuu yiri:

(ويحل لهم الطيبات ويحرم عليهم الخبائث) الأعراف ١٥٧.

Wixii wanaagsan waa xalaal waxa xunna waa xaaraan. Xalaaleynta iyo xaaraamayntu waa xaq Ilaahay kaligi leeyahay, qofkii isagu sheegta ama cid aan Ilaahay ahayn u qira wuxuu gaaloobay gaalnimadii weynayd oo diinta looga baxayey.

(أم لهم شركاء شرعوا لهم من الدين ما لم يأذن به الله)

الشورى ٢١.

Intaa kadib mabanaana in qofna ka hadlo xalaasha iyo xaaraanta, dadka culumada ah oo yaqaan kitaabka iyo sunnada Nabiga (scw) mooyee, Goodi aad u daran ayaa ku soo aroorey ciddii wax xalaaleysa ama wax xaaraamaysa iyagoon cilmi u laheyn Ilaahay wuxuu yiri:

(ولا تقولوا لما تصف السنتكم الكذب هذا حلال وهذا حرام لتفتروا على الله الكذب) النحل ١١٦.

Waxyaalaha muxaramaadka ah ee iska go'an waxaa lagu sheegey quraanka iyo sunnada Nabiga (scw) sida Ilaahay yiri;

(قل تعالوا أنزل ما حرم ربكم عليكم ألا تشركوا به شيئاً وبالوالدين إحساناً ولا تقتلوا أنفسكم من إملاق) الأنعام ١٥١.

Sunnadana sidaas oo kake ayaa loogu sheegay in badan oo ka mid ah muxaramaadka sida uu Nabigu (scw) yiri:

(إن الله حرم بيع الخمر والميتة والخنزير والأصنام) متفق عليه.

Nabigu (scw) wuxuu kaloo yiri:

(إن الله إذا حرم شيئاً حرم ثمنه) رواه الدارقطني ٧/٣.

Addiladda (nusuusta) qaarkeed waxaa ku imaan kara muxaramaadka qaar ka mid ah oo arimo gaar ah gooni ku ah, sida Ilaahay u sheegey cuntada la xarimay wuxuuna yiri:

(حرمت عليكم الميتة والدم ولحم الخنزير وما أهل لغير الله به والمنخنقة والموقودة والمتردية والنطيحة وما أكل السبع إلا ما ذكيتم وما ذبح على النصب وأن تستقسموا بالأزلام) المائدة ٣.

Ilaahay wuxuu kaloo sheegay waxyaalaha laga xarimay guurka

wuxuuna yiri:

(حرمت عليكم أمهاتكم وبناتكم وأخواتكم وعماتكم
وخالاتكم وبنات الأخ وبنات الأخت وأمهاتكم اللاتي
أرضعنكم وأخواتكم من الرضاعة وأمهات نسائكم) النساء
.٢٣

Ilaahay wuxuu kaloo sheegay waxyaalaha
kasabkooda la xarimay wuxuuna yiri:

(وأجل الله البيع وحرم الربا) البقر ٢٧٥.

Intaa ka dib Ilaahay adoomihiisa wuu u
naxariistaa, wuxuuna nooga xalaaleeyey
waxayaalaha wanaagsan wax aynaan tiro iyo
noocyo ku koobi karin, sidaa awgeed lama
faahfaahin waxyaalaha la baneeyey oo wey
badan yihiin lamana soo koobi karo, waxaase la
faahfaahiyey wixii la xarimay waayo waa la soo
koobay si aynu u barrano oo uga fogaano,
Ilaahay wuxuu yiri:

(وقد فصل لكم ما حرم عليكم إلا ما اضطررتم إليه)
الأنعام ١١٩.

Waxyaalaha xalaasha ah Ilaahay wuxuu u
baneeyey si guud ahaaneed maadaama ay
wanaagsan yihiin wuxuuna yiri:

(يا أيها الناس كلوا مما في الأرض حلالا طيبا) البقرة
.١٦٨

Ilaahay naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu wax
walba asalkooda ka dhigay xalaal ilaa laga helo
daliil xaaraamaynaya, taasina waa Ilaahay

deeqdiisa iyo inuu u waasiciyo odoomihisa, waxaana inagu waajib ah inaan adeecno oo ku xamdimo oo ku shukrino. Dadka qaar ayaa haddii ay arkaan waxyaalaha la xarimay oo la taxayo oo la faahfaahinayo kahanaya axkaamtii shareecadda, taasina waa iimaan yarida iyo faham yarida ay shareecadda ka qabaan, haddaba kuwaasi ma waxay doonayaan in loo tiriyo noocyada Ilaahay xalaaleeyey si ay ugu qancaan in diintu fudeyd tahay mise waxay kaloo doonayaan in loo soo taxo noocyada wanaagsan ee xalaasha ah si ay u gartaan in shareecadu aysan noloshooda nacsiinayn, ma waxay doonayaan in la yiraahdo hilibaha la gowracay ee Geela, Lo'da, Ariga, Bakeylaha, Ugaarta, Biciidka, Digaaga, Qooleeyda, Booloboolada, Goroyada, Ayaxa iyo Maleyga dhintay waa xalaal? mise in la yiraahdo Khuduarta, Miraha, Faakihada, iyo miraha kaloo nafaqada leh waa xalaal? mise waxay doonayaan in la yiraahdo Biyaha, Caanaha, Malabka, Saliidda, iyo khalku waa xalaal? mise in la yiraahdo Cusbada, Carfisada iyo Bohaaraadku waa xalaal? mise in la yiraahdo isticmaalka Alwaaxda, Birta, Ciida, Quruuruxa, Balaastiiga, Quraaradaha iyo Kabarku waa xalaal? mise in la yiraahdo fuulidda Daabadda Rukuubka), Baabuurta, Tareenka, Maraakiibta

iyo Diyaaraduhu waa xalaal? Mise in la yiraahdo isticmaalka qaboojiyayaalka talaajadaha, qalabka wax lagu dhaqo, kan wax lagu qalajiyo, kan wax lagu shiido, kan wax lagu cajiimo, kan wax lagu foorneeyo, kan wax lagu miiro, iyo qalabka kale ee loo isticmaalo caafimaadka, injineernimada, xisaabta, cilmiga hawada, kan xiddigaha, kan dhismaha, kan soo saaridda biyaha, Naftada, Macdanta, qalabka wax lagu nadiifiyo, kan lagu macaaneeyo Biyaha, kan wax lagu daabaco iyo kumbuyuutarku waa xalaal? mise in la yiraahdo la biska dharka Cudbiga, Xariirta, Suufka, Dhogorta, Timaha, Hargaha xalaasha ah, Layloonka iyo Boolistarku waa xalaal? Mise in la yiraahdo guurka, wax iska iibinta, wax soo iibsiga, kafaalada, Xawaalada, ijaarida, farsamadda, xirfadda sida najaarada, birtumida, hagaajinta qalabka iyo Ari raacidu waa xalaal? haddii aynu eegno suuro gal ma inoo tahay in aan tiro ku dhameyno haddii aynu damacno inaan soo tabino oo tirino waxyaalaha xalaasha ah, haddaba maxay u dan leeyihiin qoladaan aan hadalka fahmeynin? arinta kaloo ah inay xujo ka dhiganayaan in diintu fudeyd tahay waa hadal run ah oo ay baadil u adeegsanayaan, diinta fudeydkeedu sida ay iyaga la tahay ma aha, ee waa sida ku soo aroortay shareecadda,

farqiga u dhaxeeya aad ayuu u weyn yahay, in inta xaaraan la sameeyo haddana si baadil ah xujo looga dhigto diinta fudeydkeeda diintuna waa fudeyd oo shaki kuma jiro iyo in ruqsooyinka sharciga ah la qaato sida salaadda oo la kulmiyo ama iyado lagaabiyo, musaafirku inuu afuro, khufka iyo sharabaadka inuu masaxo qofkii degan labo maalmood iyo habeenadoodii, kii musaafir ahna uu masaxo seddex maalmood iyo habeenadoodii, in la tayamumo marka laga baqo biyaha isticmaalkooda, in labo salaadood la kulmiyo markii qofku jirado ama roob ku da'ayo, in ninka loo baneeyey inuu fiiriyo naagta ajnabiga ka ah hadii uu guur ka doonayo, in qofka kafaara gudka dhaarta la dooransiiyo inuu qoor xoreeyo ama cunto bixiyo ama dhar bixiyo, in la cunikaro bakhtiga marka daruufu keento iyo ruqsooyinka kale iyo wax yaabaha sharcigu fududeeyey. Waxyaalaha aanu soo dhaafney marka lagu sii daro waxaa haboon qofka muslimka ah inuu ogaado in waxyaalaha la xarimay ay xikmadi ku jirto, taaso ay ka mid tahay in Ilaahay adoomihiisa ku itaxaamayo waxyaalaha uu xarimey uuna eegayo waxay sameynayaan. Waxyaalaha ay kaga duwan yihiin Ahlu Januha Ahlu Naarka waxaa ka mid ah, in Ahlu Naarku dhax galeen waxa naftu

''
jeceshahay oo naarta lagu hareereeyey, Ahlu Januhuna ay ku sabreen waxa naftu necebtahay oo Janada lagu hareereeyey, haddii uusan jiri lahayn itaxaankaas lama kala garteen qofkii Ilaahay ku caasiyey iyo kii addeecay. Dadka muu'miniinta ah waxay u arkaan dhibka ka soo gaaraya wixii Ilaahay ku waajibiyey inay ajar ka helayaan, amarkii Ilaahayna fulinayaan si ay Ilaahay u raali galiyaan, markaa ayaa Ilaahay u fududeyn dhibkii, dadka iimaanka aan laheyna waxay u arkaan dhibka ka soo gaaraya wixii lagu waajibiyey dhibaato iyo culeys lagu siyaadiyey, markaas ayaa dhibkii ku sii siyaadayaa inay Ilaahay adeecaana ay ku adkaaneysaa. Muxaramaadka katagitaankooda waxaa ka dhadhama macaanka ay leedahay Ilaahay adeecidiisu, qofkii Ilaahay darti shey uga taga wuxuu ugu bedelaa wax ka kheyr badan wuxuuna qalbiga ka dareemayaa iimaanka macaankiisa. Kitaabkaan akhristuhu wuxuu ka helayaa tiro badan oo wixii Ilaahay xarimay ah taas oo xaaraanmadeedu ku caddahay quraanka iyo sunnada Nabiga (scw) waxyaalaha la xarimey waxay ka mid yihiin waxyaalaha falkoodu faafey dad badan oo muslimiin ahna ay ku dhacaan, xusudeeda waxaan ula jeedaa cadeyn iyo waano, Ilaahay ayaan uga baryayaa nafteyda iyo walaalaheyya

muslimiinta ah hanuun, towfiiq iyo in lagu istaago xuduuda Ilaahay uuna naga dheereeyo muxaramaadka nagana ilaaliyo xumaanta Ilaahay ayaa inta wax axifdida u khey badan inta naxariisatana asaga ayaa u naxariis badan. Culumada qaarkeed arinta muxaramaadka kutub fiican ayey ka alifeen waxa ka mida: **ALKABAA`IR** iyo **TAMBIH AL QAAFILIIN** oo uu qorey ibnu Nuxaas oo reer Dimishiq ahaa Allaha u naxariistee.

TUSMADA

Mowduuca	Bogga
Horudhaca3
Tusmada.....	13
Ilaahay oo loo shariik yeelo.	17
Qubuurta oo la caabudo.....	17
Ilaahay qeyrki oo loo gawraco.....	20
In la xalaaleeyo wuxuu Ilaahay xarimay ama la xarimo wuxuu Ilaahay xalaaleeyey.....	20
Sixirka, wax sheegyada iyo	21
In la rumeeyo in xiddiguhu saameyn ku leeyihiin dadka noloshooda iyo falalka dhacaya.....	23
In la rumeeyo in waxyaalaha lagu intifaaco uusan Ilaahay sidaas ka dhigin.....	24
Cibaadada oo loo sameeyo halagaa	26
Wax baaseysiga	27
Ilaahay qeyrki oo lagu dhaarto	29

Munaafiqiinta iyo faasiqiinta oo la weheshado ama loo wehel yeelo.....	32
Ku xasilidda salaadda oo laga tago.	33
Ciyaarta iyo dhaqaaqa oo salaadda	35
Qofka oo iimaamkiisa salaadda.....	36
In uu masaajidka yimaado qofkii soo cunay Basal, Toon, ama wax ur qurmuun.	38
Sinada.....	39
Khaniisnimada.....	42
Naagta oo isu diida ninkeeda iyadoon cudurdaar sharci ah haysan.....	43
Naagta ninkeeda weydiisata furitaan iyadoon sabab sharci ah heysan	44
Dihaarka.....	46
Ninka oo u taga xaaskiisa oo	47
Xaaska oo duburta looga tago.	48
Dumarka la isla qabo oo aan	50.
Naag ajnabi ah oo lala khaali noqdo.....	51
Naag ajnabi ah oo la gacan qaado.....	52
Naagta oo iscatarisa markay baxeeyso oo ragga la marta carafteeda.	54
Naagta oo maxram la'aan safarta.....	55

In naag ajnabi ah kas loo daawado.....	56
Dayuusnimada.....	57
Carruurta inay aabahood ku abtirsadaan oo laga bedalo ama aabaha oo.....	58
Cunidda ribada.....	59
Badeecada oo ceebteeda la qariyo marka la gadayo.....	63
libka la isku faliso.....	64
Maalinta jimcaha aadaanka labaad ka bid oo wax la iibiyo.....	65
Qamaarka iyo bakhtiyaanasiibka.....	66
Tuugada.....	69
In laaluush la qaato ama la bixiyo.....	71
Dhulka oo la boobo.....	73
Qofka oo hadiyad laga qaato.....	74
Shaqaalaha oo lagu shaqeysto oo aan u juuraddiisa la siin.....	76
Carruurta oo aan wax siinta loogu caddaalad falin.....	78
Dadka oo baahi la'aan wax la weydiisto.....	80
In qofku deynsado deyn uusan.....	81
Xaaraanta oo la cuno.....	83
Khamrada oo la cabo dhibicba.....	84
In la isticmaalo weelasha dahabka iyo qalinka ama wax lagu cuno oo wax lagu cabo.....	87
Shahaado suurka.....	88
Gitaarka iyo muusikada oo la.....	89
Xanta.....	91
Isku dirka.....	93

Dadka guryahooda oo idan la'aan	94
Seddex qof oo labo kii seddexaad ka foqda.....	95
Isbaal (ragga oo dharka hoos u dheereysta).....	96
Ragga oo isku qurxiya dahabka qaabkuu doono ha noqdee.....	98
In dumarku labisto dhar gaaban, khafiif ah oo ciriiri ah.....	99
Ragga ama dumarka oo timahooda ku xiriiryaan timo aadane ama cid kale.....	100
Ragga oo dumarka isu ekeysiiya iyo dumarka oo ragga isu ekeysiiya xagga dharka, hadalka iyo qaabka.....	101
Timaha oo madow lagu aslo.	103
In wixii noole ah lagu sawiro Dharka, Gidaarka, Warqadaha l.w.m.....	104
Riyada oo laga been sheego.	106
Qabriga oo lagu fariisto ama lagu istaago ama loo kor tago.....	107
Kaadida oo aan la iska duwin.	109
In la dhageysto dad sheekeysana sheekadood iyagoo nacaya.	110
Daris xumada.....	111
Dardaaranka oo la isku dhibo.	113
Naradka (warbac) oo la ciyaaro.....	114
Muu'minka ama cid aan.....	115
Baroordiiqa.....	116
Wajiga oo la isku dhufto ama	117
Qofka muslimka ah oo la gooyo wax ka badan seddex beri sabab sharci ah la'aanteed.....	118

ILAAHAY OO LOO SHARIIK YEELO

Shirkiga ayaa wixii Ilaahay xarimay guud ahaan ugu weyn, wuxuuna ku cad yahay xadiiskii Abuu Bakar laga wariyey oo uu yiri Nabigu (scw) Wuxuu yiri:

(ألا أنبئكم بأكبر الكبائر (ثلاثاً) قالوا قلنا: بلى يارسول الله قال: الإشراف بالله) متفق عليه.

waxaa dhici karta danbi kasta in Ilaahay qofka u dhaafo shirkiga mooyee, waana lama huraan inuu yeesho towbad gaar ah, Ilaahay wuxuu yiri:

(إن الله لا يغفر أن يشرك به ويغفر ما دون ذلك لمن يشاء)
النساء ٤٨.

Shirkiga waxaa ka mid ah mid weyn oo diinta looga baxo oo qofkii sameeya haddii uu ku dhinto naarta ku waarayo. Waxyaalaha muuqda ee shirkiga ah ee ku faafey wadamo badan oo Muslim ah waxaa ka mid ah:

Qubuurta oo la caabudo: Taas oo ay ka mid tahay in la rumeeyo in awliyada dhimatay dadka dantooda u fulinayaan, oo dadka kurbada ka feydayaan iyo in la kaalmeysto oo loo qeyshado, Ilaahay wuxuu yiri:

(وقضى ربك ألا تعبدوا إلا إياه) الإسراء ٢٣.

Taas waxaa la mid ah in la baryo dadka dhintay sida Nabiyada iyo saalixiinta ama cid kale lagana baryo shafeeco ama inay dhib feydaan Ilaahay wuxuu yiri:

(أمن يجيب المضطر إذا دعاه ويكشف السوء ويجعلكم خلفاء الأرض أإله مع الله) النمل ٦٢.

dadka qaarkood waxay caado iyo dhaqan ka dhigteen inay ku dhawaaqaan magac sheekh ama wali markii ay fariistaan ama istaagaan ama ay kufaan iyo mar walba oo ay ku dhacaan mixnad ama musiiibo iyo kurbo, kaasi wuxuu oran Muxamadow, kaasina wuxuu oran Caliyow, kaasina wuxuu oran Xuseenow, kaasina wuxuu oran Jeylaaniyow, kaasina wuxuu oran shaadaliyow, kaasina wuxuu oran rufaaaniyow, kaasina Caydaruus ayuu u yeeran kaasina sayidda Seynab ayuu u yeeran, kaasina Ibnu Calwaan ayuu u yeeran, Ilaahayna wuxuu yiri:

(إن الذين تدعون من دون الله عباد أمثالكم) الأعراف ١٩٤.

Dadka qubuurta caabuda qaarkood way ku dawaafaan qubuurta, tiirarkeedana way salaamaan oo isku masaxaan albaabkeedana waa dhunkadaan caradeedana wajiga ayey marsadaan, haddii qabrigu u muuqdana waa u sujuudaan oo hortiisa ayey istaagaan iyagoo

khushuucsan oo is dulleynaya oo weydiisanaya danahooda ay ka mid tahay in qof jiran loo caafiyo, ama in ilmo la siiyo, ama muraad loo fududeeyo, waxaana laga yaabaa in qofka qabriga baryaya uu yiraahdo sayidkeygiyow wadan fog ayaan kaaga imide gacmo maran ha igu celin, Ilaahayna wuxuu yiri:

(ومن أضل ممن يدعو من دون الله من لا يستجيب له إلى يوم القيامة وهم عن دعائهم غافلون) الأحقاف ٥.

Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(من مات وهو يدعو من دون الله ندا دخل النار) رواه البخارى .

Dadkaa qaarna madaxa ayey ku xiirtaan qabriga agtiisa, qaarna waxay sitaan kutub cinwaankeedu ka mid yahay:

(مناسك حج المشاهد).

Mashaahidda waxay ula jeedaan qubuurta ay awliyada u dhisaan. Dadka qaarkood waxay rumeysan yihiin in awliyadu adduunka maamusho oo ay dhib iyo nafac keento, Ilaahay wuxuu yiri:

(وإن يمسسك الله بضر فلا كاشف له إلا هو وإن يردك

بخير فلا رادَ لفضله) يونس ١٠٧.

Shirkiga waxaa kaloo ka mida in Ilaahay qeyrki loo nidro sida kuwa u nidra qubuurta inay u keeni doonaan shumac ama faanuus.

Shirkiga weyn ee muuqda waxaa ka mida:
Ilaahay qeyrkii oo loo gowraco, Ilaahay
 wuxuu yiri:

(فصل لربك وانحر) الكوثر ٢

Micnaha: Ilaahay u tuko oo isaga u gowrac oo
 magaciisa ku gowrac.

Nabigu (s.c.w.) wuxuu yiri:

(لعن الله من ذبح لغير الله) رواه مسلم .

Neefka la gawracay waxaa ku kulmi kara laba
 shey oo la xarimay kuwaas oo kala ah in
 Ilaahay mooyee cid kale loo gawraco, iyo in
 magaca Ilaahay mooyee wax kale lagu
 gawraco, labaduba waxay reebayaan in
 neefkaas la cuno. Gawracyada jaahiliga ah ee
 casrigaan faafay waxaa ka mid ah in jinniga loo
 gawraco, waagii hore waxay yeeli jireen haddii
 ay guri iibsadaan ama dhistaan ama ceel
 qodaan, waxay ilinkiisa ama agtiisa ku gawrici
 jireen neef, cabsi ay jinniga ka cabsanayaan
 awgeed.

Tusaale aahaan shirkiga weyn ee faafay waxaa
 ka mida: **In la xalaaleeyo wuxuu Ilaahay
 xarimey ama la xarimo wuxuu Ilaahay
 xalaaleeyey** ama in la rumeeyo inay jirto cid
 aan Ilaahay ahayn oo arinkaas xaq u leh,
 waxaa kaloo ka mid ah in loo xuguntamo

Maxkamadaha qawaaniinta jaahiliga ah wax ku xukuma iyadoo qofku khiyaarkiisa qabo kuna raali noqdo uu xalaashado ama uu rumeeyo in arintaasi banaan tahay, Ilaahay wuxuu arinkaas ku tilmaamey inuu yahay gaalnimadii weyneyd wuxuuna yiri:

(إتخذوا أحبارهم ورهبانهم أربابا من دون الله) التوبة ٣١.
Cudey Binu Xaatim markii uu maqlay Nabiga (scw) oo Aayaddaan akhriyaya wuxuu yiri: waxaan iri: Ehlu Kitaabku macaabudi jirin Baadariyaashooda markaasaa Nabigu yiri:

(أجل ولكن يحلون لهم ما حرم الله فيستحلونه ويحرمون عليهم ما أحل الله فيحرمونه فتلك عبادتهم لهم) حسنة الألباني.

Mushrikiintii Ilaahay wuxuu ku sifeeyey inay yihiin sifada Aayadaan ku cad:

(لا يحرمون ما حرم الله ورسوله ولا يدينون دين الحق) التوبة ٢٩.

sidoo kale Ilaahay wuxuu yiri:

(قل أرايتم ما أنزل الله لكم من رزق فجعلتم منه حراما وحلالا قل ءالله أنن لكم أم على الله تفترون) يونس ٥٩.

Noocyada shirkiga faafay waxaa ka mida: Sixirka wax sheegyada iyo curaafeysiga Sixirku waa gaalnimo wuxuuna ka mid yahay todobada kabaa'irta ah ee lagu halaagsamo, wuxuuna keena dhib ee wax nafci ah ma keeno. Ilaahay wuxuu barashadiisa ka yiri:

(ويتعلمون ما يضرهم ولا ينفعهم) البقرة ١٠٢.

waxaa kaloo Ilaahay yiri:

(ولا يفلح الساحر حيث أتى) طه ٦٩.

qofka sixirka isticmaala waa gaal, Ilaahay wuxuu yiri:

(وما كفر سليمان ولكن الشياطين كفروا يعلمون الناس السحر وما أنزل على الملكين ببابل هاروت وماروت وما يعلمان من أحد حتى يقولوا إنما نحن فتنة فلا تكفر) البقرة ١٠٢.

Sixirka xugunkiisu waa dil, kasabkiisuna waa xaaraan qurun ah, dadka juhalada ah, daalimiinta iyo kuwa iimaankoodu yar yahay waxay aadaan sixirowyada si ay dad kale u sixraan ama cid kale uga aarsadaan. Waxaa jira dad kaloo xaaraan ku dhacaya marka ay u cararaan sixirowga si uu uga furo sixir kale, waxaana qofka waajib ku ah inuu u cararo Ilaahay oo hadalkiisa isku daaweeyo sida suuradaha mucawidaadka iyo qeyrkoodba. Waxsheega iyo curaafuhuna Ilaahay ayay beeniyeen haddii ay sheegtaan inay qeybka ogyihiin, Ilaahay mooyee cid kale qeybka ma oga. In badan oo kuwaas ka mid ah waxay ka faa' iideystaan dadka waxmagaratada ah si ay xoolo uga qaataan, waxayna isticmaalaan dariiqado kala duwan, sida inay carruurta ku

faaliyaan ama sacabka iyo koobabka, quraaradaha, murayadaha oo ay wax ku akhriyaan, haddii ay hal mar run sheegaan sagaashan iyo sagaal jeer ayey been sheegi, laakiin dadka makastada ahi ma xusuustaan markii kali ahaa oo ay runta sheegeen beenlowyadu mooyee, markaas ayey aadayaan si ay u ogaadaan waxa soo socda, liibaanta iyo dhul dareysiga, guurka, ganacsiga iyo finay helaan wax ka dhumay iwm. Qofkii waxsheegyada aada oo rumaysta waxay sheegayaan waa gaal diinta ka baxay waxaana u daliil ah hadalkii Nabigu (scw) uu yiri:

(من أتى عرفا فسأله لم تقبل له صلاة أربعين ليلة) رواه مسلم.

waxaa ku waajib ah inuu towbad keeno salaadana tukado .

IN LA RUMEEYO IN XIDDIGUHU SAAMEYN KU LEEYITHIIN DADKA NOLOSHOODA IYO FALALKA DHACAYA

Seyd Ibnu Khaalid Aljuhani wuxuu yiri: Nabiga (scw) ayaa nagu tujiyey salaadda subax Xudeybiya, iyada oo habeenkii roob da'ay, markii uu salaaddii ka baxay ayuu yiri:

(هل تدرون ماذا قال ربكم؟ قالوا الله ورسوله أعلم قال: أصبح من عبادي مؤمن بي وكافر، فأما من قال مطرنا بفضل الله ورحمته فذلك مؤمن بي وكافر بالكوكب، وأما من قال بنوء كذا وكذا فذلك كافر بي ومؤمن بالكوكب) رواه البخاري.

Taas waxaa la mid ah in la isticmaalo bakhtiyaanasiibka ku yaal joornaalada iyo wargeesyada, qofkii rumeeya in xiddiguhu saameyn ku leeyihiin dhacdooyinka wuu gaaloobay, haddiise uu waqti dhumis ahaan isaga akhriyayo waa caasi danbi ayaana ka raacaya, waayo ma banaana in waqti dhumis ahaan loo akhriyo wax shirki ah sheydaankuna wuxuu qofka qalbigiisa ku tuurayaa inuu rumeeyo Waxaas oo markaas ay noqoto dariiq shirkigu ugu soo gabado .

Shirkiga waxaa ka mid ah **In la rumeeyo in waxyaalaha lagu intifaacayo uusan Ilaahay sidaas ka dhigin sida dadka qaarki u rumeeyey in xirsiga iyo qardhaasta shirkiga ahi wax taraan iyo sidoo kale noocyada faalka iyo jijimaha maarta ah iwm, iyadoo laga dab qaadanayo ra'yiga sixirowga iyo wax sheega ama caado hore oo la kala dhaxlay, markaa ayey luqunta ku xiran ama carruurta u xirayaan, si aysan ishu u qaban sida ay ayagu**

sheeganayaan, waxayna ku xirtaan gawaarida, guryaha iyo jirkooda, waxay kaloo gashadaan faraatyo fasas kala duwani ku jiraan, taasoo ay waxyaalo kale ka aaminsan yihiin sida inay balaayada celiso ama wax bogsiiso, taasna waxaan shaki ku jirin inay reebeyso in Ilaahay la talo saarto, dadkana waxaan jiro ahayn uma siyaadineyso waana wax xaaraan ah oo la isku daaweynayo. Qardhaasta la isku xiro badankeeda waxaa ku jira shirki cadaan ah, sida in loo qeyshado jini iyo sheyaadiin ama sawiro aan la aqoon ama qoraal aan la fahmeyn. Sixirowyada qaarkood waxay qoraan aayado quraan ah, markaasey waxay ku daraan wax kaloo shirki ah, qaarna aayado quraan ah ayey waxay ku qorayaan wax najaaso ah ama dhiiga caadada dumarka. Waxyaalaha aynu soo sheegnay xirsi ay ku qoran yihiin in la isku xiro ama la iska lulo waa xaaraan, waxaana daliil u ah hadalkii Nabigu (scw) yiri:

(من علق تميمة فقد أشرك) رواه احمد وهو في السلسلة
الصحيحة ٤٩٢.

Qofka waxyaalahaas isticmaala haddii uu rumeeyo inay Ilaahay ka sokow wax u tarayaan ama wax u dhimayaan gaalnimadii weyneyd ayuu gaaloobay, haddiise uu rumeeyo inay sabab u yihiin nafaca iyo dhibkaba iyadoo la

ogyahay inaan Ilaahay sabab uga dhigin, qofkaasi gaalnimadii yareyd ayuu gaaloobay, waxayna soo galeysaa shirkiga asbaabta ah.

CIBAADADA OO LOO SAMEEYO HALAGAA SHEEGO

Shuruudda camalka suuban waxaa ka mid ah, inuu ka hufan yahay istustus iyo inuu waafaqsan yahay sunada, qofkii cibaado u sameeya halagaa sheego shirkigii yaraa ayuu la yimid camalkiisuna wuu burey, sida qofkii u tukada in dadku arkaan, Ilaahay wuxuu yiri:

(إن المنافقين يخادعون الله وهو خادعهم وإذا قاموا إلى الصلاة قاموا كسالى يراءون الناس ولا يذكرون الله إلا قليلاً) النساء ١٤٢.

Taas waxaa la mid ah haddii uu camal u sameeyo halagaa sheego oo ha la maqlo oo iyadana shirki ayuu ku dhacayaa, goodi ayaa ku soo aroorey qofkii sidaas sameeya, sida ku sugan xadiiskii Ibnu Cabbaas iyadoo xadiiskaa sanadkiisu Nabiga (scw) gaarsiisan yahay:

(من سَمِعَ سَمِعَ اللهُ بِهِ وَمَنْ رَأَى رَأَى اللهُ بِهِ) رواه مسلم.

Qofkii cibaado u sameeya Ilaahay darti iyo dadku inay arkaan camalkiisii waa burey sida ku sugan xadiiska qudsiga ah:

(أنا أغنى الشركاء عن الشرك، من عمل عملاً أشرك فيه
معى غيرى تركته وشركه) رواه مسلم.

Qofkii camal Ilaahay darti u bilaaba ka dibna ay
ku soo dhacdo halagaa sheego haddii uu
dhibsado oo la diriro oo iska reebreebo
camalkiisii waa uu ansaxayaa, haddii uusanse
dhibsana oo naftiisu ku dagto culumada
badankeedu waxay qabaan in camalkiisii
burayo.

WAXBAASEYSIGA

Waxbaaseysigu waa in wax la shareysto,
Ilaahay wuxuu yiri:

(فإذا جاءتهم الحسنة قالوا لنا هذه وإن تصبهم سيئة
يطيروا بموسى ومن معه) الأعراف ١٣١.

Carabtu waxay ahaan jireen haddii ay damcaan
inay arrin fuliyaan

Sida safarka iwm, waxay soo qaban jireen
shimbir ka dibna waa siideyn jireen, haddii ay
midig u duusho way bisha'areysan jireen oo
Arrinkii ku dhaqaaqi jireen, haddiise ay bidix u
duusho way baaseysan jireen oo ka noqon
jireen arrinkii Nabigu (scw) arrintaa
Xugunkeeda wuxuu ku caddeeyey xadiiskii uu
yiri:

(الطيرة شرك) رواه أحمد.

Citiqaadkaas muxarramka ah oo reebaya kaamilnimada towxiidka waxaa ka mida, bilaha in la baaseysto sida in guurka la iska daayo bisha Safar ama in ayaamaha la baaseysto sida in la rumeeyo in maalinta arbacada ee bil walba u dambeysa ay tahay qumayo, ama in la baaseysto tirada seddex iyo tobanka "13", ama in la baasaysto magacyo ama dadka naafada ah sida hadii uu qofku aado dukaankiisa si uu u furo, ka dibna uu dariiqa ku arko nin weershe ah uu baaseysto oo iska laabto iwm. Waxaas oo idil waa xaaraan shirki ah, Nabigu (scw) beri ayuu ka noqday qofkii falalkaas sameeya daliilkeeduna waa xadiiskii Cumraan Ibnu Xuseen oo sanadkiisu Nabiga gaarsan yahay:

(ليس منا من تطير ولا تطير له ولا تكهن له) وأظنه
قال: (أوسحر أو سحر له) رواه الطبراني وهو في صحيح
الجامع ٥٤٣٥.

qofkii falaalkaas wax ka mid ah ku dhaca kafaara gudkiisu waa sida ku soo aroortay xadiiska Cabdulaahi Bin Cumar wuxuuna yiri: Rasuulku (scw):

(من ردت الطيرة من حاجة فقد أشرك قالوا يارسول الله
ما كفارة ذلك قال أن يقول أحدهم: اللهم لا خير إلا خيرك
ولا طير إلا طيرك ولا إله غيرك) رواه أحمد ٢/٢٢٠.

waxbaaseysigu waa dabeecad naftu leedahay mar ayuu siyaadaa marna wuu yaraadaa,

daawadiisa ugu fiican waa in Ilaahay la talo saarto, sida ku soo aroortay hadalkii Ibnu Mascuud yiri:

"وما منا إلا (أى:إلا ويقع فى نفسه شىء من ذلك) ولكن الله يذهب بالتوكل" رواه ابو داود ٣٩١٠.

ILAAHAY QEYRKI OO LAGU DHAARTO

Ilaahay wuxuu ku dhaaran karaa wuxuu doono oo makhluuqaadkiisa ah, laakiin qofka makhiuuqa ahi Ilaahay mooyee cid kale inuu ku dhaarto uma banaana. Dad badan ayaa carrabkooda waxaa ku badan dhaarta, dhaartuna waa nooc weyneynta ka mida oo aan Ilaahay mooyee cid kale ku habooneyn. Ibnu Cumar ayaa waxaa laga wariyey xadiis Nabiga (scw) gaarsan oo ahaa:

(ألا إن الله ينهاكم أن تحلفوا بأبائكم من كان حالفا فليحلف بالله أو ليصمت) رواه البخارى.

waxaa kaloo laga wariyey xadiis kaloo Nabiga (scw) gaarsan oo ahaa:

(من حلف بغير الله فقد أشرك) رواه أحمد ١٢٥/٢.

Nabiga (scw) waxaa laga wariyey inuu yiri:

(من حلف بالأمانة فليس منا) رواه أبو داود وهو فى السلسلة الصحيحة ٩٤.

Ma baana in lagu dhaarto Kacbada, amaanada, sharafta, gargaarka, barakada hebel, nolosha hebel, jaaha Nabiga (scw), jaaha Waliga, Aabayaasha, Hooyooyinka iyo Carruurta, waxaas oo dhan waa xaaraan in lagu dhaarto, qofkii intaas wax ka mida ku dhaca kafaara gudkiisu waa inuu yiraahdo LAA ILAAHA ILLAA ALLAAH, sida ku soo arortay xadiiska saxa ah:

(من حلف فقال باللات والعزى فليقل لا إله إلا الله) رواه البخارى.

Hadalka baabkaan ku soo aroorey waxaa la mida oraahyo badan oo shirki muxarram ah Muslimiinta qaarkoodna ay ku hadlaan sida in la yiraahdo: Ilaahay iyo adigaan idinmagan galayaa, adiga iyo Ilaahay ayaan idin tala saartey, waxaas adiga iyo Ilaahay ayaa ii tarey, adiga iyo Ilaahay mooyee cid kale malihi, Ilaahay ayaa cirka ii jira adiguna dhulka ayaad ii joogtaa, haddii aana Ilaahay iyo hebel heli laheyn si kale ayey iga noqon la hayd, sida saxa ah waa in lala yimaado ereyga "kadib" oo uu yiraahdo Ilaahay ayaan leeyahay ka dibna adiga, ereyada shirkiga ah waxaa ka mida anigu beri ayaan ka ahay Islaamka, guul darro joogto eheey, taas waxa la mida oraah walba oo waqtiga lagu caayayo sida, waqtigaani waa xun yahay waa saacad baas, waa waqti

khayaano iwm. Waayo cayda waqtiga la caayo waxay u laabanaysaa Ilaahii waqtiga abuurey. Hadaladaas shirkiga ah waxaa la mida, oraahdaan: dabeecadda ayaa dooneysa, iyo magac walba oo adoonimo lagu sugayo oo cid aan Ilaahay ahayn loo tiiriyo sida, Cabdul Masiix, Cabdul Nabi, Cabdul Rasuul, iyo Cabdul Xuseen.

Oraahaha iyo halkudhagyada gadaal laga keenay ee ka soo horjeeda towxiidka waxaa ka mida, Hanti Wadaaga Islaamka, Dimaqoraadiyadda Islaamka, shacabku wuxuu doonayo Ilaahay wuxuu doonayo ayey la mid tahay, Diinta Ilaahay ayaa is kaleh Wadankana dadka ayaa wada leh, magaca Kacaanka.

Waxyaalaha la xarrimay waxa ka mid ah in qof loogu magac daro oraahda boqorka boqorada iyo wixii oraaho kale ah oo la mid ah sida, qaaliga qaaliyada, in qof munaafaq ah ama gaal ah lagu caam yeelo oraahda ah sayid iyo wixii la macna ah (afkii la doono ha lagu yiraahdo ee). In la isticmaalo xarafka low kaasoo ku tusaya caro iyo fal sheydaan iyo iyado fureysa camal sheydaan. In la yiraahdo Ilaahow haddii aad doonto ii dambi dhaaf. Haddii aad dooneyso faahfaahin dheeraada eeg kitaabka MUCJAM ALMANAAHI AL

LAFDIYAH ee uu qorey sheekh Bakar Abu Seyd.

MUNAAFIQIINTA IYO GAALADA OO LALA FARIISTO OO LA WEHESHADO AMA LOO WEHEL YEELLO

Kuwa uusan iimaanku uusan qalbigooda gelin waxay u qasdayaan inay la fariistaan dad reero fisqi iyo faajir ah, balse waxaa laga yaabaa inay la fariistaan kuwa shareecaddii Ilaahay, Diintiisii iyo Awliyadiisii ku jeesjeesaya oo caayaya, shakina kuma jiro in falkaasi muxarram yahay oo caqiidada durayo Ilaahay wuxuu yiri:

(وإذا رأيت الذين يخوضون في آياتنا فأعرض عنهم حتى يخوضوا في حديث غيره وإما ينسينك الشيطان فلا تقعد بعد الذكرى مع القوم الظالمين) الانعام ٦٨.

Ma banaana in lala fariisto kuwaas oo Aayadaha Ilaahay wax ka sheegaya, haddii ay xataa qaraabo dhow yihiin ama fadhigoodu xiiso leeyahay ama sheekadoodu macaan tahay, qofku inuu Islaamka ugu yeero ama baadilka ka celiyo ama ka reebo mooyee inuu ka raali noqdo ama ka aamuso ma banaana Ilaahay wuxuu yiri:

(فإن ترضوا عنهم فإن الله لا يرضى عن القوم الفاسقين)
التوبة ۹۶.

KU XASILIDDA SALAADA OO LAGA TAGO

Jariimooyinka waaweyn ee tuuganimada ah waxaa ka mida xadida la xadayo salaada Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(أسوأ الناس سرقة الذي يسرق من صلاته قالوا يارسول الله: وكيف يسرق من صلاته؟ قال: لا يتم ركوعها ولا سجودها) رواه احمد ۳۱۰/۵.

ku xasilidda salaadda in laga tago oo dhabarku uusan ku xasilin rukuuca iyo sujuuda, oo aan qumaati loo istaagin marka rukuuca laga istaago iyo marka lagu sugan yahay fadhiga u dhaxeeya labada sujuudood, intaas oo dhan waxaa caan ku ah dad weyne badan oo tukada mana jiro masjid ka marnaan kara dad tusaale u noqon kara dadka aan salaadda ku xasilin, xasilidduna waa rukni aysan salaaddu la'aanti ansaxeyn, arrintu waa khatar Nabiguna (scw) wuxuu yiri:

(لا تجزىء صلاة الرجل حتى يقيم ظهره فى الركوع والسجود) رواه ابوداود: ۵۳۳/۱.

Shaki kuma jiro in arrinkaasi uu yahay mid xun oo qofkii sameeya mudan yahay in laga reebo

loona digo. Waxaa laga wariyey Abii Cabdulaahi Al Ashcari inuu yiri: Nabigu (scw) wuxuu tujiyey Asxaabtiisii ka dibna wuxuu la fariistey qaar Asxaabta ka mid ah, nin ayaa Masjidka soo galay oo salaad xirtay wuu rukuucay oo sujuuday oo wuxuu kasiyey sujuudii gadhaw, Nabigu (scw) wuxuu yiri: war kaas ma arkeysaan, qofkii sidaas ku dhintaa wuxuu ku dhintay Diintii Nabi Muxamed (scw) Diin aan ahayn Salaadiisa ayuu gadhaw ka siin sida tukuhu dhiiga u gadhawsado, Qofka rukuuoa iyo sujuudda gadhow ka siinaya wuxuu la mid yahay qof baahan oo aan cuneyn hal iyo labo timira mooyee, maxay baahidiisii ka deeqi. Ibnu khuseyma ayaa ku wariyey saxiixa.

Seyd Ibnu Wahabna waxaa laga wariyey inuu yiri, Xudeyfa ayaa wuxuu arkay nin aan taam yeeleyn rukuuca iyo sujuudda markaas ayuu ku yiri: maadan tukan, haddii aad sidaas ku dhimatid kuma aad dhiman Diintii fidrada ahayd ee Ilaahay Nabi Maxamed (scw) la soo direy.

Waxaa ku haboon qofkii ka taga ku xasilidda salaadda hadduu ogaado xugunkeeda inuu ku soo celiyo salaadda waajib ka ah ee waqtigeedii uu joogo, tii waqtigeedii tageyna uu Ilaahay uga towbad keeno, kuma waajibayso inuu salaadihii tagey soo celiyo sida uu

caddeeyey xadiiskii ahaa (Noqo oo tuko ma aadan tukane).

CIYAARTA IYO DHAQAAQA OO SALAADDA LAGU BADIYO

Taasi waa aafu aysan ka nabadgelin dad tiro badan oo tukanaya, Waayo ma fulinayaan ammarkii Ilaahay yiri: (Ilaahay u istaga idinka oo khushuucsan) Albaqara 238. mana fahmayaan hadalkii Ilaahay yiri: (Waxaa liibaanay mu'iniintii salaadooda ku khushuuca) Almu'iniin 1-2.

Nabiga (scw) markii la weydiiyey qof sujuudaya oo carrada gacanta ku simaya wuxuu yiri: Ha masaxin carrada adigo tukanaya, haddii ay lama huraan noqoto in aad sameyso hal mar quruuruxa sin" waxaa wariyey Abuu daa'uud 1/581.

Culumadu waxay sheegeen in dhaqaaqa badan ee isku xiga oo dan la'aanta ah salaaddu ku bureyso, haddaba sidee noqonayaan kuwa ku cayaaraya salaadooda iyago Ilaahay hortaagan, qaarkood saacadooda ayey eegayaan ama maradooda toosinayaan ama sanku ayey farta iska galinayaan ama midig iyo bidix iyo kor eegayaan oo aysan ka baqeyn in aragooda la dafo ama sheydaanku salaadooda xado.

QOFKA OO IIMAAMKIISA SALAADDA KAS UGALA HORMARA

Dadka dabeecaddooda waxa ka mid ah degdega.

(وكان الإنسان عجولاً) الإسراء ١١.

Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(التأني من الله والعجلة من الشيطان) رواه البيهقي.

In badan ayuu qofku arkayaa isaga oo jamaaco ku jira dad badan oo ku tukanaya midigtiisa iyo bidixdiisa, balse wuxuu ku arki naftiisa marmar inuu iimaamka kala hormarayo rukuuca iyo sujuuda iyo takbiirta guud ahaan iyo salaama naqsigaba. Arintaasi waxay u muuqataa inaysan dad badan ahmiyad la lahayn, waxaa ku soo aroorey goodi kulul oo Nabiga (scw) laga wariyey wuxuuna yiri:

(أما يخشى الذي يرفع رأسه قبل الإمام أن يحول الله رأسه رأس حمار) رواه مسلم.

Haddiiba qofka tukanaya la faray inuu salaadda ku yiimaado deganaasho, sidee noqoneysaa salaadda qudheedu, dadka qaarki inay iimaamka ka hormaraan waxay ku dheehaan inay ka dib maraan, ha la ogaado culumada Allaha u naxriistee waxay sheegeen xeer fiican oo arrintaasi leedahay kaasoo ah: Qofka

iimaamka la tukanaya waxaa ku haboon inuu dhaqaaqiisa ka bilaabo marka ay go'do takbiirta imaamka oo ra'da Allaahu akbar ku jirta ay dhamaato, kana hormari maayo kana dib dhici maayo, markaa arintu xeer ayey yeelaneysaa, Asxaabtii Nabigu (scw) aad ayey ugu dadaali jireen inaysan Nabiga (scw) ka hormarin, mid ka mid ah Asxaabta oo la oran jirey Baraa' Binu Caasib (rac) wuxuu yiri: Asxaabtu Nabiga (scw) ayey ku daba tukan jireen, haddiii uu Nabigu kor uga soo noqdo rukuuca ma arki jirin qof dhabarkiisa soo qaloociya ilaa Nabigu (scw) wajigiisa dhulka dhigo, markaa ka dib ayey ku dabo tukanayaan oo sujuuda u soo hooban jireen. waxaa wariyey Muslim.

Marka uu Nabigu duqoobay oo dhaqaaqiisii culeys galay, dadkii la tukanayey ayuu baraarujiyey oo wuxuu yiri:

(يا عبيها الناس أنى قد بدنت فلا تسبقونى بالركوع والسجود)
رواه البيهقى وحسنه.

Imaamka waxaa laga doonaya inuu ku dhaqmo takbiirta sunnada ah oo ku soo aroortay xadiiska Abu Hureyra uu wariyey (rac):

(كان رسول الله صلى الله عليه وسلم، إذا قام إلى الصلاة يكبر حين يقوم ثم يكبر حين يهوى ثم يكبر حين يرفع رأسه ثم يكبر حين يسجد ثم يكبر حين يرفع رأسه، ثم

يفعل ذلك كلها حتى يقضيها، ويكبر حين يقوم من التثنتين بعد الجلوس) رواه البخارى.

Hadduu imaamku ka dhigo takbiirtiisa mid ku lifaaqan xarakadiisa qofka la tukanayana uu fuliyo xeerkaa aan soo sheegnay Arinta jamaacadu way hagaagi.

INUU MASJIDKA YIMAADO QOFKII SOO CUNAY BASAL, TOON AMA WAX UR QARMUUN

Ilaahay wuxuu yiri:

(يا بنى آدم خذوا زينتكم عند كل مسجد) الأعراف ٣١.

Jaabir ayaa waxaa laga wariyey inuu yiri

Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(من أكل ثوما أو بصلا فليعتزلنا أو قال: فليعتزل مسجدنا وليقعد في بيته) رواه البخارى.

وفى رواية لمسلم (من أكل البصل والثوم والكراث فلا يقربن مسجدنا فإن الملائكة تتأذى مما يتأذى منه بنو آدم).

Cumar Binu Khadaabna . dadka ayuu u khudbadeeyey maalin jimce ah khudbadiisii wuxuu ku yiri:

(ثم إنكم أيها الناس تأكلون من شجرتين لا أراهما إلا خبيثتين: هذا البصل والثوم لقد رأيت رسول الله صلى الله عليه وسلم إذا وجد ريحهما من الرجل في المسجد أمر به فاخرج إلى البقيع فمن أكلها فليمتهما طبخا) رواه مسلم.

Arrintaas waxaa soo galaya dadka isla marka ay shaqada ka soo baxaan masjidka soo gala iyado qarmuun ka soo urayo kilkilahooda iyo iskaalsadooda, kuwaas waxaa ka xun kuwa sigaarka caba oo inta sigaarka xaaraanta ah soo dhuuqa masjidka soo gala oo adoomada Ilaahay, Malaai'igta iyo dadka tukanaya ku dhiba.

SINADA

Markii shareecada qasadkeeda ay ka mid noqotay in Cirdiga (sharafta dumarka) iyo taranka la ilaaliyo, ayaa shareecada waxaa ku soo arooray xarimidda sinada, Ilaahay wuxuu yiri:

(ولا تقربوا الزنى إنه كان فاحشة وساء سبيلا) الإسراء
٣٢

Balse shareecadu waxay ku xirtay wadooyinkii sinada lagu gaari lahaa oo dhan in la faro xijaabka, in indhaha la laabo iyo in qof ajnabi ah lala khaali noqdo iwm.

Qofkii reer yeeshay oo sineysta waxaa lagu ciqaabi ciqaabta ugu fooshaxun oo ugu daran, taaso ah in dhagax lagu garaaco ilaa uu ka dhinto si uu u dhadhamiyo abaalka ficilkiisa xun. Waa inay xanuunsataa xubin walba oo jirkiisa ka mida sida uu ugu raaxeystay

xaaraanta. Qofka sineysta oo aan nikaax xalaal ah soo marin waxaa lagu karbaashi tirada ugu badan ee ku soo aroortay shareecada, taas oo ah boqol jeedal, iyada oo ay u dheertahay fadeexada iyo ceebta ka raaceysa dadka Mu'miniinta ah ee fiirsanaya karbaashidiisa iyo in laga musaafuriyo hal sano meesha uu jariimada ku galay.

Dadka sineysta nolosha Barsakha ah waxaa lagu cadaabi Tanuur xagga sare ciriiri ka ah, xagga hoosena waasac ka ah, xagga hoose ayaa dab looga shidayaa waxaana lagu ridi dadka sineysta iyago qaawan. Marka dabka lagu shido ayey qeylin oo kor soo aadayaan ilaa ay sigaan inay soo baxaan, markii dabku baso ayey hoos u noqon cadaabkaas ayey ku jirayaan ilaa qiyaamaha.

Arintu aad ayey u sii fool xumaaneysaa hadduu qofku mar walba sineysanayo isago sii gaboobaya oo qabriga ku sii dhowaanaya Ilaahayna u seeto dheereynayo.

Waxaa Abu Hureyra laga wariyey xadiis Nabiga (scw) gaarsan oo ahaa:

(ثلاثة لا يكلمهم الله يوم القيامة ولا يذكهم ولا ينظر إليهم
ولهم عذاب أليم شيخ زان وملك كذاب وعائل مستكبر)
رواه مسلم.

Waxlaga shaqeeyo waxaa ugu xun lacagta ay qaataan dumarka jirkooda gata, qofta sineysaneysa ee jirkeeda gadaneysa duco laga aqbali maayo habeen barkii marka albaabada samada la furo, mana aha baahida iyo faqrigu cudurdaar sharci ah oo looga talaabi karo xuduuda Ilaahay, horey waxaa loo yiri " Gabadha xorta ah inay baahato ayey ka xigtaa inay naasaheeda gadato inay farjigeeda gadatana iskaba daa.

Waqtigaan aan joogno albaab walba ayaa loo furey fool xumadii, sheydaankuna dhagartii iyo dhagarta xulafadiisa ayuu dariiqii foolxumada ku sahlay, markaa ayaa waxaa raacay caasigii iyo macsilowiyadii markaas ayaa waxaa faafey dumarkii qaawanaa oo wareegaya, qof walbana wuxuu sii daayey indhihiisa oo xaaraantii la fiirsaday, waxaa faaftay rag iyo dumar isku dhex jira, waxaa la faafiyey joornaalo iyo filimo fool xun, waxaana aad loogu dhoofay wadamada gaalada, waxaana la sameeyey suuq looga ganacsado dhilaysiga oo in badan lagu xad gudbo cirdiga (sharafta dumarka), waxaa batay wacalladii iyo ilmaha uurka lagu dilo .

Ilaahow waxaan ku weydiisaneynaa raxmadaada, naxariistaada, asturkaaga iyo ilaalin aad naga ilaaliso foolxumada, waxaaan

ku weydiisaneynaa in aad qalbigeena dahirto oo farjigeena ilaaliso oo aad anaga iyo xaaraanta nakala dhex dhigid Teed iyo gidaar.

KHANIISNIMADA

Jariimadii qoladii reer Luud lagu halaagay waxay ahayd inay ragga u tagi jireen Ilaahay wuxuu yiri:

(ولوطا إذ قال لقومه إنكم لتأتون الفاحشة ما سبقكم بها من أحد من العالمين * أنكم لتأتون الرجال وتقطعون السبيل وتأتون في ناديكُم المنكر) العنكبوت ٢٩.

Jariimadaas fool xumadeeda iyo khatarteeda Ilaahay wuxuu ku ciqaabay qoladii sameysay afar cuquubo oo Ilaahay uusan qolo kale isugu darin, kuwaaso ah in indhahoodii la masaxay in la rogay, in xaggoodii sare hoos la mariyey, in dhagxaan roob looga dhigey iyo in lagu qeyliyey. Shareecada Islaamku ciqaabta ninka wax fuula iyo kan la fuulayba waa in seef lagu dilo, haddii ay raaligooda iyo khiyaarkooda ku sameeyeen. Ibnu Cabbaas ayaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan oo ahaa:

(من وجدتموه يعمل عمل قوم لوط فأقتلوا الفاعل والمفعول به) رواه احمد.

Waxaa soo baxay maanta daacuun iyo cudurro kaloo dadkii inaga horeeyey aysan qabi jirin, sababteeduna waa macsida sida: Aydhiska

dilaaga ah, taasi waxay ku tusaysaa xikmada laahay inuu u doorey ciqaabtaan xeesha dheer cidii falkaa xun la timaada.

NAAGTA OO ISU DIIDA NINKEEDA IYADON CUDURDAAR SHARCI AH HAYSAN

Abu Hureyra ayaa Nabiga (scw) wuxuu ka wariyey inuu yiri:

(إذا دعا الرجل امرأته إلى فراشه فأبت فبات غضبان
عليها لعنتها الملائكة حتى تصبح) رواه البخارى.

Dumar badan ayaa haddii ay is qabtaan ninkooda ku ciqaaba inay isu diidaan oo xaqiisa u diidaan iyagoo isla quman, waxaa laga yaabaa inay arintaas ka dhalan karto arrimo fool xumo weyn keeni kara oo ay ka mid tahay in ninkeedu xaaraan ku dhoco ama in arrintu iyada isku rogto oo uu ku fakero inuu la guursado. Qofta dumarka ah waxaa laga dooni inay u degdegto ogolaanshaha ninkeeda haddii uu weydiisto, iyadoo fulineysa hadalkii Nabigu (scw) uu yiri kaasoo ahaa:

(إذا دعا الرجل امرأته إلى فراشه فلتجب وإن كانت على
ظهرقتب) زوائد البراز وهو فى صحيح الجامع ٥٤٧.

ninkana waxaa laga doonayaa inuu u daneeyo xaaskiisa haddii ay jiran tahay, haddii ay uur leedahay iyo haddii ay kurbaysan tahay si ay heshiis u ahaadaan oo aysan isu khilaafin.

NAAGTA OO NINKEEDA WEYDIISATA FURITAAN IYADON SABAB SHARCI AH HAYSAN

Dumar badan ayaa haddii uu khilaaf yar dhex maro ayaga iyo ninkooda ama uu siin waayo lacagta ay rabto ku degdega inay weydiistaan furitaan, waxaaba laga yaabaa inay soo riixayaan qolo wax isku dirta oo qaraabadooda ah ama dariskooda ah, ama waxaa laga yaabaa inay ninka la baratanto oo ku tiraahdo hadalo ka careysiiya, sida haddaad nin tahay car I fur, sida la ogyahay furitaanka waxaa ka dhasha dhibaato weyn iyo in qoysku burburo oo carruurto kala haado, waxaa dhici karta inay shalaydo waqti aanay shalayto waxtarayn, arrintaas iyo qeyrkeedba waxay tuseysaa xikmadda shareecada markii ay joojisey arrntaas, Thowbaan ayaa waxaa laga wariyey xadiis uu Nabiga (scw) ka wariyey:

(أيما امرأة سألت زوجها الطلاق من غير ما بأس فحرام
عليها رائحة الجنة) رواه أحمد.

Cuqba Binu Caamir waxaa laga wariyey xadiis uu Nabiga ka wariyey:

(إن المختلعات والمنزعات هن المنافقات) رواه الطبرانی
فی الكبير ٣٣٩/١٧.

Haddiise ay jirto sabab sharci ah sida in ninku salaadda ka tago, khamrada iyo maandooriyaha cabo ama uu ku khasbo arrin xaaraan ah ama uu dulmiyo oo dilo, ama uu xuquuqdeeda u diido, oo waano wax ka tariweydo oo heshiiskii la isku dayo socon waayo, markaa dhib kuma jiro haddii qofta dumarka ahi furitaan weydiisato si ay u badbaadiso diinteeda iyo nafteeda.

DIHAARKA

Hadaladii hore ee dadkii jaahiligu oran jireen ummaddaana ku dhex faafey, waxaa ka mid ah Dihaarka, oo ah in ninku ku yiraahdo xaaskiisa hooyadey ayaad iga tahay ama walaashey ayaad iga tahay iyo wixii la macno ah ee ka mid ah oraahaha xun ee shareecadu muujisey xumaantooda, sababtoo ah waxaa ku jira dulminta dumarka, Ilaahay wuxuu ku sifeeyey hadalkaas:

الذين يظاهرون منكم من نسائهم ما هن أمهاتهم إن أمهاتهم إلا اللاتي ولدنهم وإنهم ليقولون منكرا من القول وزورا وإن الله لعفو غفور) المجادلة ٢.

Shareecadu arintaas kafaara gudkeeda way adkaysay waxayna shabahdaa kafaara gudka qoka kama` loo dilo, waxay kalo shabahdaa kafaaragudka qofka xaaskiisa u taga maalin Ramadaan. Ninkii xaaskiisa ka dhaarta uma banaana inuu u tago ilaa kafara gud uu la yimaado Ilaahay wuxuu yiri:

(والذين يظاهرون من نسائهم ثم يعودون لما قالوا فتحرير رقبة من قبل أن يتماسا ذلكم توعظون به والله بما تعملون خبير * فمن لم يجد فصيام شهرين متتابعين من قبل أن يتماسا فمن لم يستطع فإطعام ستين مسكينا ذلك لتؤمنوا بالله ورسوله وتلك حدود الله وللكافرين عذاب أليم) المجادلة .٤-٣

NINKA OO U TAGA XAASKIISA OO CAADO QABTA

Ilaahay wuxuu yiri:

(ويستلونك عن المحيض قل هو أذى فاعتزلوا النساء في المحيض ولا تقربوهن حتى يطهرن) البقرة ٢٢٢.

Marka ninka xaaskiisa uma banaana ilaa ay daahir noqoto oo ay ka qubeysato. Ilaahay wuxuu yiri:

(فإذا تطهرن فاتوهن من حيث أمركم الله) البقرة ٢٢٢.

Dambigaas fool xumadiisa waxaa caddeynaya hadalkii Nabigu (scw) yiri:

(من أتى حائضا أو امرأة في دبرها أو كاهنا فقد كفر بما أنزل على محمد) الترمذی ٢٤٣/١.

Qofkiise kama` ugu taga asago aan ogeyn arintaa xugunkeeda, danbi malaha, qofkii ulakac u sameeya asago og, kafaragud ayaa laga doonayaa sida ay qabaan culumada qabta in xadiiska kafaaragudku sax yahay, kafaara gudkaas waa in la bixiyo diinaar ama nus diinaar, culumada qaarkood waxay yiraahdeen khiyaar ayuu u leeyahay, qaarna waxay yiraahdeen, haddii ninku u tago xaaskiisa marka dhiigu ku bilowdo diinaar ayuu bixinayaa, haddiise uu u tago marka ay ka siibaxayso ee dhiigu yaraado ama inta aysan qubaysan nus diinaar ayuu bixin. Diinaarka qiimaha loo isticmaalo waa 4.25garaam oo Dahab ah, Intaas ayuu sadaqaysan ama qiimaheeda oo lacag ah, waxaase sax ah inuu khiyaar u leeyahay nuska ama diinaarka, farqina makalalaha dhiiga bilowgiisa iyo dhammaadkiisu.

XAASKA OO DUBURTA LOOGA TAGO

Dadka xag jirayaasha ah oo iimaankoodu yar yahay kama sariigtaan inay xaaskooda duburta uga tagaan (meesha xaarku ka soo baxo), taasina waxay ka mid tahay dunuubta kabaa'irta ah Nabiguna (scw) wuu lacnaday qofkii falkaas sameeya.

Abu Hureyra waxaa laga wariyey xadiis Nabiga (scw) gaarsan:

(ملعون من أتى امرأة في دبرها) رواه أحمد ٤٧٩/٢.

Nabigu (scw) wuxuu kaloo yiri:

(من أتى حائضا أو امرأة في دبرها أو كاهنا فقد كفر بما أنزل على محمد) الترمذی ٢٤٣/١.

Inkastoo dumarka fidraddo fiican tahay ay diidayaan arrintaas, Haddana ragga qaarkood furitaan ayey ku handadaan haddii aysan ogolaan, ragga qaarkoodna way siraan xaaskooda iyadoo dumarku ka xishoonayaan inay weydiyaan culumada arintaas waxay u daliishadaan:

(نسائكم حرث لكم فأتوا حرثكم أنى شئتم) البقرة ٢٢٣.

Waxaa la og yahay in sunadu quraanka faserito, taaso ay ku soo aroortay in Nabigu (scw) sheegay inay banaan tahay inuu ninku kaga yimaado xaaskiisa jihadii uu doono xagga hore iyo xagga dambe, maadaama ay meeshu tahay

meesha carruurtu ka soo baxdo, wax qarsoomi kara ma aha, in duburta laga xaaro aysan ahayn meehsa carruurtu ka soo baxdo. Jariimadaas sababteedu waa in qofku uu galo nolol guur nadiif ah, isago wata dhaqan jaahili ah iyo isticmaal xaaraan ah ama madaxiisa ay ka buuxaan aflaam fool xun oo uu fiirsaday, taaso uusan Ilaahay uga towbad keenin, waxa la ogsoon yahay in ficilkaasi xaaraan yahay haddii ay xataa labaduba ku heshiyaan, sidaasna ku xalaalobi maayo.

DUMARKA LA ISLA QABO OO AAN LOO CADDAALAD FALIN

Waxyaalaha Ilaahay inoogu dardaarmay kitaabkiisa waxaa ka mida in dumarka la isla qabo loo caddaalad falo Ilaahay wuxuu yiri:

(ولن تستطيعوا أن تعدلوا بين النساء ولو حرصتم فلا تميلوا كل الميل فتنروها كالمعلقة وإن تصلحوا وتتقوا فإن الله كان عفورا رحيمًا) النساء ١٢٩.

Cadaaladda la doonayo waa in looga caddaalad falo xaga hoyashada iyo in mid walba xaqeeda la siiyo sida masruufka iyo marasha, ee cadaaladdu maaha muxabada

qalbiga, waayo qofku taas awood uma laha. Ragga qaar ayaa haddii uu guursado hal xaas ka badan, mid qura xageeda u leexday kuwii kalena ka taga oo faraha ka qaado oo mid qura badanaaba la seexda ama mid qura wax siiya kuwa kalena aan wax siin, arintaasi waa xaaraan, qofkii sidaas sameeyana maalinta qiyaame wuxuu ku imaanayaa sifada ku soo aroortay xadiiskan Abu Hureyra ka wariyey Nabiga (scw):

(من كانت له إمرأتان فمال إلى إحداهما جاء يوم القيامة وشقه مائل) رواه ابوداود ٦٠١/٢.

NAAG AJNABI AH OO LA LA KHAALI NOQDO

Sheydaanku wuxuu ku dadaalayaa inuu dadka fitneeyo oo xaaran ku rido sidaa awgeed ayaa Ilaahay nooga digay oo yiri:

(يا أيها الذين آمنوا لا تتبعوا خطوات الشيطان ومن يتبع خطوات الشيطان فإنه يأمر بالفحشاء والمنكر) النور ٢١.

Sheydaanku wuxuu Aadanaha kaga socdaa meesha dhiigu kaga dureero, dariiqyada sheydaanku u adeegsado inuu dadka danbiga ku rido waxaa ka mida in qof dumara oo ajnabi ah la la khaali noqdo, sidaa awgeed shareecadu dariiqaas waa oodey sida ku cad hadalkii Nabigu (scw) yiri:

(لا يخلون رجل بإمرأة إلا كان ثالثهما الشيطان) رواه الترمذی.

Nabigu wuxuu kaloo yiri:

(لا يدخلن رجل بعد يومی هذا علی مغیبة إلا ومعه رجل أو إثنان) رواه مسلم.

Uma banaana in ninku kula gaar noqdo meel guri ah ama qol ama gaari naag ajnabi ka ah sida walaalki xaaskiisa, ama jaariyada, ama naagta jiran oo dhakhtar u gasho iwm. Dad badan ayaa arrintaas fududeysta kalsooni uu isku qabo awgeed markaas ayaa waxaa ka dhasha in xumaantii lagu dhaco ama lagu dhawaado, arrintu waxay sii foolxun tahay marka uu is dhex galo nasabka iyo wacalladu.

NAAG AJNABI AH OO LA GACAN QAADO

Arintaani waxay ka mid tahay waxyaalaha caadooyinka jaahiliga ah Islaamku ku khilaafay, dad badana ku dhaqmaan oo dadku caadooyinkooda iyo dhaqankooda iyo hidahooda baadilka ah ay ka hormariyaan diinta, oo haddii aad qof ka mida aad la hadasho oo aad u sheegto xugunka diinta - oo aad xujada ku oogto oo daliil u keento, wuxuu kugu eedeyn dib u socodnimo, qaraabo goysnimo iyo in dadka niyada fiican shaki lagu

beero iwm. Waxana ummadeena caado u noqotay in la gacan qaado: Gabadha Adeerku dhalay, Gabadha Eedadu dhashay, Gabadha Abtigu dhalay, Gabadha Habar yartu dhashay, Walaalka Xaaskiisa, Adeerka Xaaskiisa iyo Abtiga Xaaskiisa waxayna noqotay mid ka fudud biyo la cabayo, haddii ay ku eegi lahaayeen il wax arkeysa khatarta arintu leedahay xagga shareecada, sidaa may sameeyeen. Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(لأن يطعن في رأس أحدكم بمخيط من حديد خير له من أن يمس امرأة لاتحل له) رواه الطبرانی. ۲۰/۲۱۲.

Shaki kuma jiro in arintaasi ay ka mid tahay sinada gacanta ee Nabigu (scw) sheegay wuxuuna yiri:

(العینان یزنیان والیدان تزنیان والرجلان تزنیان والفرج یزنی) رواه أحمد ۱/۴۱۲.

Ma qof Nabi Maxamed (scw) ka qalbi fiican ayaa jira sidaaso ay tahay wuxuu yiri:

(إني لا أصافح النساء) رواه أحمد ۶/۳۵۷.

sidoo kale wuxuu yiri:

(إني لا أمس أيدي النساء) رواه الطبرانی في الكبير ۲۴/۳۴۲.

Caa'isha (rac) waxaa laga wariyey inay tiri:

(ولا والله ما مست يد رسول الله صلى الله عليه وسلم يد امرأة قط غير أنه يبایعهن بالكلام) رواه مسلم.

War hooy Ilaahay ha ka baqeen dadka ku handadaya dumarkooda saalixa ah inay furidoonaan hadii aysan walaalkood gacan qaadin, waxaa haboon in la ogaado in haddii gacanta wax la iska xijiyo ama maro la saarto aysan waxba tareyn oo ay laba gooraba uu xaaraan yahay gacan qaadku.

NAAGTA OO ISCATARISA MARKA AY BAXAYSO OO RAGGA LA MARTA CARAFTEEDA

Arintani waxay ka mid tahay waxyaalaha faafay casrigaan inkastoo Nabigu (scw) aad uga digay wuxuuna yiri:

(أيما امرأة إستعطرت ثم مرت على القوم ليجدوا ريحها فهي زانية) رواه أحمد ٤/٤١٨.

Dumarka qaarkood qaafil ayey iska yihiin ama waa iska fudaystaan arintaas marka ay la joogaan darawalka, ninka wax iibiya iyo waardiyaaha iskuulka, balse shareecadu aad ayey u adkaysay in dumarka catarka ismariya ay u qubeystaan sida qasliga looga qubaysto

haddii ay doonayso xitaa masjidka, Nabigu wuxuu yiri (scw):

(أَيُّمَا امْرَأَةٍ تَطَيَّبَتْ ثُمَّ خَرَجَتْ إِلَى الْمَسْجِدِ لِیَجِدُوا رِيحَهَا لَمْ یَقْبَلْ مِنْهَا صَلَاةَ حَتَّى تَغْتَسِلَ بِإِغْتِسَالِهَا مِنَ الْجَنَابَةِ) رواه أحمد ٤٤٤/٢.

Ilaahay uun baa loo sheegtaa dhibta ay leeyihiin dumarka - isticmaala uunsiga iyo catarka marka ay u socdaan aroosyada iyo xafladaha iyo barfuunada urka dheer ee ay ku isticmaalaan suuqyada iyo gaadiidka lagu socdo iyo meelaha lagu kulmo xataa masaajida ayey ku isticmaalaan habeenada Rabadaanka. Shareecada waxaa ku soo aroorey in dumarka catarkoodu yahay kan midabkiisu muuqdo caraftiisu qarsoon tahay, Ilaahay waxaan ka baryeynaa inuusan noo caroon oo uusan ragga iyo dumaarka saalixiinta ah u qaban waxay samaynayaan ragga iyo dumarka sufahada ah oo uu dhamaan ku hanuuniyo jidka toosan.

NAAGTA OO MAXRAM LA`AAN SAFARTA

Labada kitaab oo saxa ah (saxiixeynka) waxaa ku soo arooray in Ibnu Cabaas laga wariyey inuu yiri: Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(لا تسافر المرأة إلا مع ذي محرم)

Safarkaas waxaa soo galaya safarada oo dhan xataa safarka Xajka, qofta dumarka ah haddii ay safarto maxram la`aan waxaa ku dhiiranaya faasiqiinta oo maagaya, iyaduna waa qof tabar yar oo waxaa laga yaabaa inay duufsadaan xaalada ugu yar oo ku imaan karta waa in cirdigeeda iyo sharafta wax loo dhimo, taas waxaa la mid ah inay diyaarad raacdo haddii xataa maxram sugootiyo maxram kalena ka hor yimaado sida dadka qaarki yeelaan. Kursiga dhinaceeda ah yaa ku fariisan, haddii diyaaradda ciladi ku timaado oo ay ku degto Garoon kale ama ay dib u dhacdo ama waqtigeedii isbedelo xaalkeedu muxuu noqonayaa? waxaa jira qisooyin badan. Qofka maxramka noqonaya waxaa laga doonayaa afar shardi oo ah inuu Muslim yahay, qaan gaar yahay, caaqil yahay iyo inuu ragg yahay. Sida nabigu (scw) uu yiri:

(أبوها أو ابنها أو زوجها أو أخوها أو نومحرم منها) رواه مسلم.

IN NAAG AJNABI AH KAS LOO DAAWADO

Ilaahay wuxuu yiri:

قُلْ لِلْمُؤْمِنِينَ يَغُضُّوا مِنْ أَبْصَارِهِمْ وَيَحْفَظُوا فُرُوجَهُمْ ذَلِكَ
أَزْكَى لَهُمْ إِنَّ اللَّهَ خَبِيرٌ بِمَا يَصْنَعُونَ) النور ٣٠.

Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(فزنا العين النظر) رواه البخاري.

Xarimada diintu xarimtay in la fiirsado Naagta ajnabiga ah waxaa laga soo reebayaa wixii baahi sharci ah keentay sida eegida ninka guurka doonaya, dhakhtarka sidoo kale waxaa la xarimay in qofta dumarka ah ragga ajnabiga ah fitno ahaan u fiirsato, Ilaahay wuxuu yiri:

(وقل للمؤمنات يغضضن من أبصارهن ويحفظن
فروجهن).

Sidoo kale waxaa la xarimay in shahwo ahaan loo daawado wiilasha quruxsan, waxaa kaloo xaaraan ah in ninku fiirsado nin cawradi ama naagtu fiirsato naag cawradeed, cawro walba oo aysan banaanayn in la fiirsado ma banaana in la taabto haddii xataa wax la iska xijiyo, dadka qaarkood waxaa ku ciyaaray shaydaan oo waxay fiirsadaan sawiro, joornaalo iyo aflaam iyago xujo ka dhiganaya inaysan run ahayn, waana arin aad u cad inay shahwada kicinayso dhibaato weyna ku jirto.

DAYUUSNIMADA

Ibnu Cabaas waxaa laga wariyey xadiis Nagiga laga wariyey:

(ثلاثة قد حرم الله عليهم الجنة: مدمن الخمر والعاق
والديوث الذي يقر في أهله الخبث) رواه أحمد ٦١/٢

Waxyaalaha dayuusnimada ah waxaa ka mid ah in isha laga laabo gabadha ama xaaskaa iyadoo guriga joogta oo teleefan kula sheekaysanaysa oo kula haasaawi nin ajnabi ah waxaa la mida in na'ag reerka ka mida loo ogolaado inay nin ajnabi ah gaari la fuusho sida deréewalka reerka iyo wixii la mid ah iyo in looga raali noqdo inay xijaab la'aan baxaan oo uu fiirsado kii soo socda iyo kii sii socdaba, taas waxaa lamid ah in guriga la keeno aflaamta iyo joornaalada fasaadka fidinaya.

CARUURTU INAY AABAHOOD KU ABTIRSADAAN OO LAGA BEDELO AMA AABAHA OO CARUURTIISA INKIRA.

Uma banaana qof Muslim ah inuu ku abtirsado qof aan aabihi ahayn ama uu sheegto qolo uusan ahayn, dadka qaar ayaa arintaas u sameeya si ay u gaaraan arimo maado ku saabsan oo tesarahooda waxay ku cadaynayaan abtirsiiyo aan kooda ahayn, qaarna waxay u sameeyaan si ay u xasdaan aabahoodii ka tegey iyago yar, waxaas oo dhan

waa xaaraan, waxaana ka dhalanaya xumaatooyin waaweyn oo kale duwan sida maxramnimada, Guurka, dhaxalka iwm. Waxaa ku soo arooray kitaabka saxiixa ah xadiis laga wariyey Sacdiyo Abi Bakar (rac) oo Nabiga gaarsan:-

(من إذعى إلى غير أبيه وهو يعلم فالجنة عليه حرام) رواه البخاري.

Shareecadu waxay reebtay wax walba oo nasabka waxa u dhimaya ama bedelaya, ragga qaar ayaa markii ay isqabtaan xaaskooda wuxuu ku eedeyaa sino wuxuuna inkiraa markhaati la'aan carruurtiisa iyadoo ku dhalatay gogoshiisa, dumarka qaar ayaa amaanaada khiyaana markaas ayay sino ku uuraystaan oo ninkooda nasabkiisa waxay soo galiyaan ilmo uusan dhalin, goodi kulul ayaa ku soo aroorey xadiis uu ka maqlay Abuu Hureyra Nabiga," markii ay soo degtay aayadda cadaynaysa islacnadida ninka iyo naagta " isagoo leh:

(أما امرأة أدخلت على قوم من ليس منهم فليس من الله في شيء ولن يدخلها الله جنته، وأما رجل جحد ولده وهو ينظر إليه إحتجب الله منه وفضحه على رؤوس الأولين والآخرين) رواه أبو داود ٦٩٥/٢٠.

CUNIDDA RIBADA

Ilaahay quraanka kariimka kuma sheegin ogeysiis uu ku ogeysiinayo qof dagaalki kuwa ribada cuna mooyee , Ilaahay wuxuu yiri:

(يا ايها الذين آمنوا اتقوا الله ونروا ما بقى من الربا إن كنتم مؤمنين* فإن لم تفعلوا فأنزوا بحرب من الله ورسوله)
البقرة ۲۷۸-۲۷۹.

intaas ayaa ku filan caddeyta foolxumada dambigaani ku leeyahay Ilaahay agtiisa, qofkii u dhabagala ummadda heer qof iyo heer dowladeed wuxuu arkayaa burburka iyo baaba'a uu keenay isticmaalka ribadu, taas oo ay ka mid tahay ceyrtoobida, badeecad baarta, caajis, deynta oo la bixin waayo, dhaqaalaha oo burbura, shaqa la'aanta oo siyaada, shirkado iyo meherado badan oo burbura, in wixii la shaqeeyo iyo shaqaalaha dhididkoodu ku shubmo khaanada bixinta ribo aan dhammaanayn oo qofka ribo qaatuhu leeyahay, in dad weynaha ay ka dhex abuuranto dabaqado, taasina ay keento in xoolo fara badan ay ku wareegaan gacanta dad yar, waxaa laga yaabaa qaababkaasi inuu ka mid yahay waxa Ilaahay ugu goodiyey inuu la dagaalamayo dadka qaata ribada.

Dadka ribada ka qeyb qaata oo ay ka mid yihiin dhinacyada aasaasiga ah iyo ciddii gacan ku

siisa waxaa lagu lacnadey Nabi Muxamad carrabkiisa, waxaa laga wariyey Jaabir (rac) in uu yiri Nabigu (scw) wuxuu lacnaday:

(أكل الربا وموكله وكاتبه وشاهديه) وقال: (هم سواء) رواه مسلم.

sidaas awgeed ma banaana in laga shaqeeyo kala qorida ribada, in la diiwaan geliyo in la qabto ama la bixiyo, iyo in la keydiyo ama la ilaaliyo, guud ahaan ma banaana in laga qayb qaato ribada ama si uun lagu gacan siiyo.

Nabigu (scw) wuxuu ku dadaalay inuu foolxumada ribada ku cadeeyo xadiis laga wariyey Cabdullaahi Bin Mascuud oo Nabiga gaarsan:

(الربا ثلاثة وسبعون بابا أيسرها مثل أن ينكح الرجل أمه، وإن أربى الربا عرض الرجل المسلم) رواه الحاكم.

iyo xadiis kale oo laga wariyey Cabdullaahi Bin Xandala (rac) oo Nabiga gaarsan:

(درهم ربا يأكله الرجل وهو يعلم أشد من ستة وثلاثين زنية) رواه أحمد ٢٢٥/٥.

Ribada guud ahaan ayaa loo xarimay ee laguma gaar yeelin qof maal qabeen ah ama sabool ah sida ay u qabaan dadka qaarki, balse waa mid taaban karta qofwalba iyo xaalad walba, imisa qof oo maalqabeen ah ayaa ku ceyrtowday, dhacdooyinka ayaa ka markhaati kacaya arintaa, dhibka ugu yar ee ay keeni

karto waa iyada oo xoolaha barakada laga qaado tiradoodu haba badnaatee Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(الربا وإن كثر فإن عاقبته تصير إلى قل) رواه الحاكم.

Ribada xaaraanmadeedu ma aha mid ku kooban in qeybta ribada ah sheyga ku jirta sareyso ama hooseeyso ama badan tahay ama yar tahay ee ribada dhamaanteed waa xaaraan, qofka ribada cuna aakhiro marka qabriga la soo saarayo wuxuu u istaagayaa sida qof sheydaan taabtay oo suuxdinnimo qaba in kasta oo bembigani foolxun yahay hadana Ilaahay wuxuu inoo sheegay inuu toobad leeyahay uuna inoo cadeeyey qaabkii looga toobad keenayo wuxuuna ku yiri dadka ribada ku dhaqma:

(وإن تبتم فلکم رؤوس أموالکم لاتظلمون ولا تظلمون)

Taasina waa cadaalada qudheedii. Waxaa waajib ah in qofka mu'minka ah uu ka fiigo dembigaas weyn oo uu xumaantiisa dareemo, xataa dadka dantu ku qabatay inay xoolahooda dhigtaan bangiyada ribada iyagoo xoolahooda uga baqaya dhumid ama xadid, waxaa ku haboon inay dareemaan dareen qof daruuro u geysay oo ay la mid yihiin qof cunaya bakhti wax ka daran, oo ay Ilaahey dembi dhaaf weydiistaan kuna dadaalaan inay ka

badashaan, mana banaana inay bangiyada weydiistaan in ribo loo saaro xoolahooda, balse hadii xisaabtooda ribo loogu shubo waa inay ku bixiyaan dariiqo banaan oo aan sadaqo aheyn, Ilaahay waa wanaagsanyahay mana aqbalo xoolo aan wanaagsanayn umana banaana inay qaab uun ugu intifaacaan, uma banaana inay wax ku cunaan, wax ku cabaan, dharku gataan, gaadiid ku raacaan, deegaan ku gataan, ama ay ku bixiyaan masruuf waajib ku ah sida xaaska, Carruurta, Aabaha iyo Hooyada mana banaana in lagu bixiyo zako iyo canshuur ama qof la dulmiyayo isaga reebo dulmiga, balse wuu iska miidaaminayaa isagoo ka baqaya Ilaahay qabashadiisa .

BADEECADA OO CEEBTEEDA LA QARIYO MARKA LA GADAYO

Rasuulku (scw) wuxuu soo maray weel cunto lagu gadayo markaasuu gacanta galiyey cuntadii farihiisii waxay taabteen qoyaan markaas ayuu yiri:

(ما هذا يا صاحب الطعام؟ قال: أصابته السماء يارسول الله، قال: أفلا جعلته فوق الطعام كي يراه الناس؟ من غش فليس منا) رواه مسلم.

Dadka wax gata maanta badankoodu waa dad aan Ilaahey ka baqayn waxay isku deyayaan

inay sheyga ceebtiisa qariyaan oo wax ku dhejiyaan ama sheygii xumaa ayey alaabta u hoos marinayaan ama wax ayey ku buufin ama u isticmaalayaan wax kiimiko ah ama la mid ah oo u muujinaya in alaabtu qurxan tahay ama waxay qarinarsaa codkii xumaa ee matoorka laga maqli lahaa marka hore ee la shido oo haddii qofkii alaabta gatay uu qaato ay wax yar ka dib halaabeeyso qaarkoodna waxay bedelaan taariikhda ay dhaceeyso alaabtu ama waxay u diidayaan qofkii alaabta gadanayey inuu arko alaabtii ama baaro, ama iska tajrubeeyo dad badan oo kuwa gawaarida iyo qalabka gada ah ma sheegaan ceebta alaabta, taasina waa xaaraan Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(المسلم أخو المسلم ولا يحل لمسلم باع من أخيه بيعاً فيه عيب إلا بينه له) رواه ابن ماجه.

dadka qaar waxay u maleynayaan in masuuliyadii ka dhacday hadduu mar ku yiraahdo qofka wax ka iibsanaya naadada waxaan gadayaa kuus biro ah, iibkaasi waa beec laga qaaday barakadii sida Nabigu uu yiri:

(البيعان بالخيار ما لم يتفرقا فإن صدقا وبينا بورك لهما في بيعهما، وإن كذبا وكتما محقت بركة بيعهما) رواه البخارى.

IIBKA LA ISKU FALISO

libka la isku faliso waa in alaabta qiime ku siyaadiyo qof aan iibsaneyn si uu u khiyaano dadka kale oo ugu soo jiido inay qiimaha siyaadiyaan, Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(لا تتاجشوا) رواه البخارى.

Taasi waa nooc khiyaanada ka mid ah shakina kuma jiro, Nabiga (scw) wuxuu yiri:

(المكر والخديعة فى النار) السلسلة الصحيحة ١٠٥٧.

dad badan oo dalaaley ka ah xaraashka, meelaha wax lagu naadiyo iyo carwooyinka gawaarida lagu gado kasabkoodu waa booli waayo waxay dhexgalayaa waxyaalo badan oo xaaraan ah, oo ay ka mid tahay iibka la isku faliso, ama in qofkii shayga soo gadan lahaa la kadiyo ama kii wax iska iibin lahaa la khiyaamo, oo inta la isugu dhaco badeecaddiisa la sicir jabiyo, haddiise iyagu badeecada leeyihiin ama qof ka mid ah leeyahay arrintaas lidkeeda ayey sameynayaan waxay isku dhex qararin dadka wax gadanaya markaas ayey qiimaha naadada kor u qaadayaan, adoomaha Ilaahay ayey khiyaanayaan oo dhibayaan .

MAALINTA JIMCAHA AADAANKA LABAAD KA DIB OO WAX LA IIBIYO

Ilaahay wuxuu yiri:

(يا أيها الذين آمنوا إذا نودى للصلاة من يوم الجمعة فاسعوا إلى ذكر الله وذكروا البيع ذلكم خير لكم إن كنتم تعلمون) الجمعة ٩.

dadka wax iibiya waxay sii wadaan inay waxa ku iibiyaan dukaamadooda ama masaajidda hortooda aadaanka labaad ee jimcaha ka dib, kuwaas waxaa dambiga la wadaagaya kuwa wax ka gadanaya rumayba ha ku ahaatee sida raajixa ah iibkaasi waa baadil, dadka iska leh maqaayadaha, foornooyinka iyo warshadaha qaarkood waxay ku qasbaan shaqaalahooda inay waqtiga salaadda jimcaha shaqeeyaan, kuwaas in kastoo aad moodid inay faa'iideen hadana dhab ahaantii wax aan khasaare ahayn ma ay siyaadsan. Qofka shaqaalaha ah waxaa ku waajib ah inuu ku shaqeeyo hadalkii Nabigu yiri (scw):

(لا طاعة لبشر في معصية الله) رواه أحمد ١/١٢٩.

QAMAARKA IYO BAKHTIYAANASIIBKA

Ilaahay wuxuu yiri:

(إنما الخمر والميسر والأنصاب والأزلام رجس من عمل
الشیطان فأجتنبوه لعلکم تفلحون) المائدة ٩٠.

dadkii hore ee jaahiliga ahaa waxay isticmaali jireen qamaarka qaabka ugu badan ee ay u isticmaali jireen wuxuu ahaa hal rati ayaa toban qof si isla'eg ugu shirkoobaan ka dibna waa loo qori tuuri, oo markaa toddoba qof ayaa qaadan tirooyin is dheer oo ay isla yaqaanaan, seddex qofna waxba qaadan mayaan. Maantana qamaarku dhowr qaab ayuu leeyahay waxaa ka mid ah: waxa loo yaqaan bakhtiyaanasiib wuxuuna leeyahay qaabab badan, kuwa ugu sahlan waxaa ka mid ah in lacag lagu iibsado lanbaro lagana soo dhex saaro qofka koowaad ee guuleystay lana siiyo abaal gudka koowaad, qofka labaadna la soo saaro, oo sidaas oo kale lagu sameeyo, oo sidaa lagu bixiyo abaal gudyo dhowr ah oo qiimohoodu kala duwan yahay, taasina waa xaaraan haddii xataa ay ku magacaabaan samafal. Waxaa kaloo ka mida In qofku soo gato alaab gudaheeda ay ku jiraan waxaan la aqoon ama lasiiyo lambar markuu

gato alaabta oo markaas lambarkaas lagu xadido dadka ku guuleystay abaal gudka.

Qaababka qamaarka ee maanta jira waxaa ka mid ah heshiisyada caymiska ganacsiga ah, kuna saabsan nolosha, gaadiidka, badeecada iyo gubashada iyo caymiska guud ahaaneed iyo caymiska cid kale ku saabsan iyo wixii la mid ah ee qaabab kala duwan leh, xataa fanaaniinta heesta qaar ayaa codkooda caymis galiya. Haddaba dhammaan qaababka qari iska turka ah waxay soo galayaan qamaarka, maanta waxaa la helayaa golayaal iyo meelo u gaar ah qamaarka, waxaa ku jira waxa loo yaqaan miisaska ciyaaraha oo loogu tala galay in lagu sameeyo danbigaas weyn, taas waxaa la mid ah sharadka la isu xirto marka ay ciyaarayaan kooxaha kubadda cagta iwm, taasina waa nooc qamaarka ka mid ah waxaa kale oo laga helaa meelaha lagu ciyaaro iyo meelaha lagu nasto noocyo ka mid ah cayaaraha la isticmaalo oo ay ku jirto fikradda qamaarka sida tan ay ku magacaabaan (ALfalaybers). Tartanada iyo baratankuna waa seddex qeybood:

1- Wixii qasakoodu sharci yahay waa banaan yahay haddii abaal gud loo sameeyo iyo haddii kaleba sida tartanka awrta fardaha tuuryada shiishka, taas waxaa soogalaya tartanka

cilmiga sharciga sida quraan xifdinta sida raajixa ah.

2- Wixii naf ahaantiisa isaga banaan sida ciyaarta kubadda cagta iyo tartanka orodada haddii laga saaro wixii xaaraan ah sida salaadda oo la dayaco iyo cawrada oo la feydo markaa way banaan tahay abaal gud la'aan.

3- Wixii naf ahaantiisa u xaaraan ah ama xaaraan keenaya sida fasaadka lagu magacaabo tartanka boqoradda quruxda tartanka feerka ay ku jirto wajiga la iska dilo waa xaaraan, ama tartanka loo qabto wananka hardankooda iyo digaaga isqaniinaya iyo wixii la mid ah.

TUUGADA

Ilaahay wuxuu yiri:

(والسارق والسارقة فاقطعوا أيديهما جزاء بما كسبا نكالا من الله والله عزيز حكيم) المائدة ٣٨.

Jariimada tuuganimada kuwa ugu weyn waxaa ka mid ah in wax laga xado dadka xujeyda ah iyo kuwa guriga Ilaahay camiraya, dadka tuugada noocaasa ah waa kuwo aan qiimo u yeelin xuduuda Ilaahay, iyagoo jooga meesha dhulka ugu fadli badan iyo agagaarka guriga Ilaahay, Nabigu (scw) wuxuu yiri:

في قصة صلاة الكسوف (لقد جىء بالنار وذلكم حيث رأيتموني تأخرت مخافة أن يصيبني من لفحها، وحتى رأيت فيها صاحب المحجن يجر قصبه (أمعاءه) في النار كان يسرق الحاج بمحجنه فإن فطن له قال إنما تعلق بمحجني وإن غفل عنه ذهب به) رواه مسلم.

Tuuganimada ugu weyn waxaa ka mid ah in la xado xoolaha dad weynaha, dadka arintaa sameeya qaarkood waxay yiraahdaan sida dadka kale u xadaan ayeynu u xadeynaa, mana ay oga in taasi tahay xadid ay muslimiinta oo dhan xadeen, waayo xoolaha dad weynuhu wuxuu ka dhaxeeyaa muslimiinta oo dhan, ficilka ay ku kaceen dadka aan Ilaahay ka

baqeyn ma aha mid xujo u noqon kara in lagu daydo, dadka qaar ayaa xada xoolaha gaalada ayagoo xujo ka dhiganaya inay gaalo yihiin taasina sax ma aha, gaalada ay banaan tahay in xoolahooda la qaato waa gaalada la diriraysa muslimiinta ee ma soo galayaan shirkadaha iyo dadka gaalada ah oo dhan, qaababka wax loo xado waxaa ka mid ah in dadka kale jeebkooda gacanta loo rito iyado la jeebsiibayo, qaarna waxay galaan dadka guryahooda iyagoo booqanaya markaasey xadayaan, qaarna waxay xadaan boorsooyinka dadka soo martiya, qaarna waxay soo galaan meelaha ganacsiga markaas ayey alaabta ku qarsadaan jeebabkooda iyo maryahooda ama sida dumarka qaarkood sameeyaan oo ah inay maradeeda hoosteeda alaabta ku qarsato, dadka qaar waxay fududeysteen xadida waxyaalaha yar yar ama qiimaha yar ,Nabiguna wuxuu yiri (scw):

(لعن الله السارق يسرق البيضة فتقطع يده ويسرق الحبل فتقطع يده) رواه البخارى.

waxaa ku waajib ah qof walba oo wax xada inuu u celiyo qofkii lahaa markii uu Ilaahay u toobad keeno ka dib, waa isku mid in alaabta caddaan loo celiyo iyo inuu qof kale usii dhiibo, hadduu waayo qofkii alaabta iskalahaa ama

ciddii dhaxalkiisa lahayd uuna aad u raadiyey wuu sadaqeysanayaa ajarkana wuxuu u niyeysanayaa qofkii alaabta laga soo xaday .

IN LAALUUSH LA QAATO AMA LA BIXIYO

Qaaliga ama qofka dadka kala xukumaya in laaluush la siiyo si uu qof xaqi u duudsiyo ama arin baadil ah uu u socodsiiyo waa jariimo, waayo waxay keeneysaa in aan cadaalad wax lagu xukumin iyo in la dulmiyo qofkii xaq lahaa iyo in fasaadka la fidiyo, Ilaahay wuxuu yiri:

(فلا تأكلوا أموالكم بالباطل وتدلوا بها إلى الحكام)
لتأكلوا فريقا من أموال الناس بالاثم وأنتم تعلمون (البقرة)
١٨٨

Abu hureyra waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan oo ahaa:

(لعن الله الراشئ والمرئشئ في الحكم) رواه أحمد.

wixiise ku yimaada qofka isago xaqiisa dhacsanaya ama isago dulmi iska celimaya oo aysan u suuro gali karin inuu laaluush bixiyo mooyee soo gali maayo goodiga la sheegey. Waayahaan laaluushku aad ayuu u fiday ilaa uu u noqday shaqaalaha qaarkood il dhaqaale oo ka weyn mushaaradooda, balse wuxuu ka mid noqday qodab ka mid ah miisaaniyadda shirkado badan, isagoo cinwaan daboolan leh,

waxayna noqotay inaan arrimo badan labilaabin ama aan la dhameyn in laaluush labixiyo mooyee, taasina waxaa dhib weyn ka soo gaartay dadka saboolka ah waxaana ku halaabay xuquuq badan, waxayna sabab u noqotay in shaqaaluhu ku xumaadaan dadkii ay u shaqaynayeen, shaqo fiican loo qaban maayo qofkii aan laaluush bixin, qofkii aan laaluush bixin shaqo xun ayaa loo qaban ama waa la daahin ama danba laga gali maayo, dadkii laaluushka bixiyey oo isaga ka danbeeyeyna mar hore ayaa loo dhameeyey arintoodii, laaluush sababti ayaa xoolo ka mid ahaa xaq uu lahaa qofka loo shaqeynayey galeen jeebabka shaqaalaha wax sii gada ama kuwa wax soo gada. Arimahaas aan soo sheegnay iyo kuwo kaloo la yaab ma leh in Nabigu (scw) uu ku habaaray dadka jariimadaan shirkada ku ah iyo ciddii ka qeyb qaadatayba in Ilaahay ka dheereeyo raxmadiisa, waxaa laga wariyey Cabdullaahi Bin Cumar (rac) inuu yiri Nabigu (scw):

(لعن الله على الراشى والمرتشى) رواه ابن ماجه.

DHULKA OO LA BOOBO

Haddii qofka laga waayo cabsida Ilaahay qofka awoodiisa iyo xeeshiisu waxay ku noqotaa dhibaato, wuxuuna u adeegsanayaa dulmi sida inuu boobo dadka kale xoolahooda taas waxaa ka mida dhulka oo la boobo, arrintaa cuquubadeedu aad ayey u daran tahay, waxaa laga wariyey Cabdullaahi Binu cumar xadiis Nabiga gaarsan oo ah:

(من أخذ من الأرض شيئاً بغير حقه خسف به يوم القيامة إلى سبع أرضين) رواه البخارى.

Waxaa laga wariyey Yaqlaa Binu Murrah (rac) xadiis Nabiga gaarsan:

(أما رجل ظلم شبرا من الأرض كلفه الله أن يحفره (وفى الطبرانى: يحضره) حتى آخر سبع أرضين ثم يطوقه يوم القيامة حتى يقضى بين الناس) رواه الطبرانى.

Taas waxaa soo galaya in la bedalo calaamadaha iyo xuduuda dhulka oo qofku dhulkiisa ku durkiyo dariskiisa waana taas lagu ishaaray hadalkii Nabigu (scw) yiri oo ahaa:

(لعن الله من غير منار الأرض) رواه مسلم.

QOFKA OO HADDIYAD LAGA QAATO MARKA LOO SHAFEECO

Qofku inuu waji iyo darajo ku leeyahay dadka dhexdooda waa nicmooyinka Ilaahay adoonkiisa uu siiyo hadduu ku shukriyo, nicmadaan ku shukrinteeda waxaa ka mida inuu isku dayo inuu muslimiinta ku anfaco, taasna waxay soo galaysaa guud ahaan hadalkii Nabigu yiri:

(من استطاع أن ينفع أخاه فليفعل) رواه مسلم.

Qofkii wajigiisa ku anfaco qof muslim ah oo dulmi ka celiyo ama khayr u soo jiida isagoo aan wax danbi ah galin ama aan ku xad gudbin xaq qof kale leeyahay Ilaahay agtiisa ajar ayuu ku leeyahay, haddii niyadiisu khaalis tahay sida Nabigu (scw) arrintaas u sheegay:

(اشفعوا تأجروا) رواه أبو داود.

Mabanaana in qof wax ku qaato shafeeco iyo waasido waxaana u daliil ah xadiiskii Abu Umaama laga wariyey oo Nabiga gaarsan:

(من شفع لأحد شفاعاً ، فأهدى له هدية (عليها) فقبلها(منه) فقد أتى باباً عظيماً من أبواب الربا) رواه أحمد.

Dadka qaar ayaa soo bandhigaya inay wajigooda iyo waasadooda ay ku qaadanayaan lacag ay ku shardinayaan shaqada ay

qabanayaan sida in qof shaqo la qoro ama laga bedalo wasaarad, ama gobol oo meel kale loo bedalo ama qof jiran in la daweyo IWM. sida raajixa ahna lacagtaas waa xaaraan waxaana u daliil ah xadiiskii Abu Umaama ee aan soo marnay, balse xadiiska daahirkiisa waxaa soo galaya wax qaadashada oo dhan haddii xataa uusan hore u shardin, qofka khayrka sameynaya waxaa ku filan ajarka Ilaahay siinayo oo uu aakhiro helayo. Nin ayaa u yimid Xasan Binu Sahal isagoo ka doonayo inuu u shafeeco oo dan u dhameeyo wuuna u dhameeyey markaasaa ninkii u yimid isago u mahad noqaya, Xasan Binu Sahal wuxuu ku yiri maxaad nooga shukriyeysaa, anagu waxaan aragnaa in wajigu sako leeyahay sida xooluhu sako u leeyihiin. Waxaa wanaagsan inaan halkaan ku ishaarno farqiga u dhaxeeya in qof loo ijaaro inuu arin soo dhameeyo oo uu dabo galo oo uu la socdo uuna qaato ujr, taasina waa arin galaysa baabka ujrada banaan iyadoo wadata shuruucdeeda sharciga ah, iyo in qofku wajigiisa wax ku waasideeyo oo ku shafeeco oo lacag ku qaato taasi waa xaaraan.

SHAQAALAHA OO LAGU SHAQEYSTO OO AAN UJUURADIISA LA SIIN

Nabigu wuxuu dhiiri galiyey in qofka shaqaalaha ah degdeg loo siiyo xaqiisa wuxuuna yiri:

(أعطوا الأجير أجره قبل أن يجف عرقه) رواه ابن ماجه.

Dulmiga ka dhaca dad weynaha muslimka ah waxaa ka mid ah in shaqaalaha iyo dadka la soo kireysto aan la siin xaqooda taasina waxay ku dhacdaa dhowr si: In qofka loo shaqeynayey shaqaalaha xaqoodii oo dhan inkiro, shaqaaluhuna uusan haysan wax cadeyn ah, kaas xaqiisu hadduu aduunka ku dhumo aakhiro Ilaahay agtiisa ku dhumi maayo, aakhiro waxaa la keenayaa qofkii daalimka ahaa oo qofkii uu dulmiyey xoolihiisii cunay, markaasaa qofkii wax dulmiyey xasanaadkiisii waxaa la siinayaa kii la dulmiyey, xasanaadku markii ay dhamaadaan ayaa danbigii qofkii la dulmiyey kii wax dulmiyey dusha laga saari ka dibna naarta ayaa lagu tuurayaa.

- In shaqaalaha xaqiisii aan lawada siin oo wax laga naaqusiyo Ilaahay wuxuu yiri isagoo arinkaa ka hadlaya:

(ويل للمطففين) المطففين ١ .

Taas matalkeeda waxaa ka mid ah dadka shaqooyinka leh hadday ka keensadaan shaqaale wadankoodii oo hashiis kula soo galay mushahar go'an, markay ku soo xirmaan oo ay shaqadii bilaabaan heshiiskii ayuu wuxuu u bedelaa mushaaro tii hore ka yar, markaasay karaahiyo kula joogaan, mana awoodi karaan inay xaqoodii cadaystaan, markaasay arintooda Ilaahay u bandhigaan, haddii qofka shaqada leh oo wax dulmiyey uu muslim yahay kan la dulmiyeyna gaal yahay naaqusintaas xaqiisii aan la siin waxay noqoneysaa mid ka hor istaagta inuu soo islaamo.

- In shaqaalaha shaqadii loogu daro mid dheeraad ah ama lagu dheereeyo saacadihii shaqada oo mushaarkiisii mooyee aan wax kale la siin, inuu saacado dheeraad ah shaqeystana aan loo ogolayn.

- In shaqaalaha la warwareejiyo oo aan wixiisii la siin in lagu dabo joogo oo la dacweeyo oo maxkamadda la tago mooyee, waxaa dhici karta qofka shaqada leh daahintaas inuu ula jeedo in shaqaaluhu iska quusto oo uu xaqiisii ka tago oo uusan waxba weydiisan, ama uu ula jeedo inuu ka faa'iideysto xoolaha shaqaalaha oo uu ku shaqeysto, qaarna ribo ayey ka qaataan, shaqaalihiina ma haystaan waxay ku qadeeyaan iyo waxay u diraan carruurtoodii iyo

xaasaskoodii oo baahan oo uu qurbaha daraadood ay u soo aadeen. Kuwaas dulmiiowyada ah cadaab kulul ayey leeyihiin maalinta qiyaame, waxaana laga wariyey Abu Hureyra (rac) in Nabigu (scw) uu yiri:

(قال الله تعالى: ثلاثة أنا خصمهم يوم القيامة، رجل أعطى بي ثم غدر، ورجل باع حرا وأكل ثمنه ورجل إستاجر أجيرا فاستوفى منه ولم يعطه أجره) رواه البخاري.

CARRUURTA OO AAN WAX SIINTA LOOGU CADDAALAD FALIN

Dad ayaa waxay yeelaan inay carruurtooda qaar ka mid ah siiyaan, oo ku gaar yeelaan wax aysan carruurta kale siin, taasina sida raajixa ah waa danbi weyn haddii aysan jirin sabab sharci ah oo keentay, sida inay jirto baahi u gaar ah oo kuwa kale aysan qabin, sida jiro ama deyn lagu leeyahay ama abaal gud quraanka xifdigiisa lagu siiyey ama inuu shaqo waayey ama reer xaas weyn uu yahay, ama uu yahay arday cilmi u go'ay, aabuhuna waa inuu niyeystaa hadduu carruurtiis mid ka mid ah uu sabab sharci ah oo uu la gaar yahay awgeed wax ku siiyo in haddii mid ka mid ah carruurta kale sabab taas oo kale ku imaan lahayd uu siin

lahaa sida uu kii hore u siiyey, daliilka guud ahaaneed oo arintaas waa:

(إعدلوا هو أقرب للتقوى واتقوا الله).

Daliilka gaar ahaaneedna waa xadiiskii laga wariyey Nucmaan Ibnu Bashiir oo ahaa: In aabihi uu Nabiga u yimid oo uu ku yiri" wiilkeygaan waxaan u hadiyeeyey adoon aan lahaa", Nabigu wuxuu ku yiri:" carruurtaada oo dhan asaga oo kale ma siisay? wuxuu yiri: maya, Nabiga wuxuu yiri" ka celi".

Riwaayad kale waxay ahayd inuu yiri: " Ilaahay ka cabsada oo carruutiina u cadaalad fala, wuxuu yiri wuu noqday oo ka celiyey wixii uu siiyey, Riwaayad kale waxay ahayd in Nabigu yiri: "haddaba markhaati ha iiga dhigan anigu dulmi markhaati ka noqon maayee". Carruurta marka wax loo qeybinayo wiilka waxaa la siiyaa wixii gabadhu qaadato labanlaabkeed sida dhaxalka, sidaa waxaa qaba imaam Axmed Allaha u naxariistee. Qofkii u siidhaba gala xaalada qoysaska qaarkood wuxuu ogaanayaa inay jiraan aabeyaal aan Ilaahay uga baqeyn inay ku kala fadilaan carruurtooda wax siinta, markaasaa qaarba qaarka kale u caroonayaa, wuxuu ku dhex abuurayaa cadaawad, waxaa laga yaabaa inuu mid wax siiyo waayo wuxuu u egyahay adeeradi kuwa kalena wuu u diidayaa waayo waxay u egyihiin

abtiyaashood, ama xaasaskiisa mid ka mid ah carruurteeda ayuusan wax siineyn carruurta kalena wuu siinayaa, waxaa laga yaabaa inuu xaasaskiisa mid ka mid ah carruurteeda iskuul geeyo kuwa kalena uusan geyn taasina isaga ayey dib ugu soo noqon, ilmaha wax loo diido sida badan uma baari noqdaan aabihi waaga damba, Nabigu (scw) wuxuu ku yiri qofkii ku kala fadilay carruurtiisa wax siinta" sow ku farximaysid inay si isku mid ah kuugu baari ahaadaan". Axmed ayaa wariyey.

DADKA OO BAAHI LA'AAN WAX LA WEYDIISTO

Suhayl Ibnu Xandalah waxaa laga wariyey inuu yiri Rasuulku wuxuu yiri:

(من سأل وعنده ما يغنيه فإنما يستكثر من جمر جهنم، قالوا وما الغنى الذى لا تتبغى معه المسألة؟ قال قدر ما يغنيه و يعشيه) رواه أبو داود.

Waxaa laga wariyey Ibnu Mascuud (rac) inuu yiri Rasuulku wuxuu yiri:

(من سأل وله ما يغنيه جاءت يوم القيامة خدوشا أو كدوشا فى وجهه) رواه أحمد.

Dadka yaboohsada qaarkood waxay ka istaagaan masaajida waxayna hor istaagaan ummadda Ilaahay iyagoo wardiga tuugsigooda

uga kala gooyneya, qaarkoodna been ayey sheegaan, warqado been ah ayey qaataan waxay isku duwdaan sheekooyin, waxaa laga yaabaa inay dadka qoyskoodu ka kooban yahay ay masaajida u qaybiyaan oo ay wax ka aruursadaan ayna isaga gooshaan masaajida, iyagoo ku jira xaalad ay ka deeqtoon yihiin oo Ilaahay uun garanayo, haddii ay dhintaan uun ayey muuqaneysaa xoolihii ay ka tageen, dadka iyaga ka soo hara oo ah dadka baahan oo dhabta ah dhowrsanaantooda awgeed qofkii aan aqoon wuxuu moodayaa inay maal qabeen yihiin, dadka wax waydiisanmayaana dadkuna ma fahmayaana oo ku sadaqeysan mayaana.

IN QOFKU DEYNSADO DEYN UUSAN DOONEYN IN UU BIXIYO

Dadka xuquuqdoodu Ilaahay agtiisa wey ku weyn tahay, waxaa laga yaabaa in qofku xaqa Ilaahay ku leeyahay uu towbad keen uga baxo, laakiin xuquuqda dadku ku leeyahay sina loogama fakan karo in la bixiyo inta aysan imaan maalin aan la isku kala xukumayn diinaar iyo dirham midna, laakiin la isku kala xukumaayo xasanaad iyo danbiyaal, Ilaahayna wuxuu yiri:

(إن الله يأمركم أن تؤدوا الأمانات إلى أهلها) النساء ٥٨.

Dad weynaha wax yaalaha ku dhex faafey waxaa ka mid ah in la sahlado deyn qaadashada, dadka qaar ayaa u deynsanayn baahi daran, ee wuxuu u deynsan inuu is balaariyo, iyo inuu dad kale kula tartamo awgeed, inuu iska badelo gaariga, alaabta guriga, i.w.m. Oo ah alaab iyo qalab dhamaanaya, dadkaas in badan waxaa wareerka galiya qaabka iibka haftada, kaasoo in badan oo ka mid ahi aysan ka marneyn shubho ama xaaraan.

Deyn qaadashada oo la fududeysto waxay ku hogaamineysaa in bixinteeda la warwareejiyo ama ay keento in dadka xoolihiisa la dhumiiyo ama la baabi'iyo, Nabiguna wuxuu yiri isagoo ka digaya arrintaas cirib xumadeeda:

(من أخذ أموال الناس يريد أداءها أدى الله عنه، ومن أخذ يريد إتلافها أتلفه الله) رواه البخارى.

Dadku deynta aad ayay u fududeystaan waxayna u malaynayaan inay fududahay, Ilaahay agtiisana waa ku weyn tahay, balse gofka shahiidka ah inkasta oo uu leeyahay wax weyn oo gaar ah, ajar weyn iyo martabo sareysa haddana ka nabad gali maayo waxa ka yimaada deynta, waxaa u daliil ah hadalkii uu yiri Nabigu (scw):

(سبحان الله ماذا أنزل الله من التشديد في الدين، والسذى
نفسى بيده لو أن رجلا قتل فى سبيل الله ثم أحيى ثم قتل
وعليه دين ما دخل الجنة حتى يقضى عنه دينه) رواه
النسائى.

Haddaba intaas ka dib malaga yaabaa in kuwa
fududeysta oo xad gudba ay ilaaliyaan dadka
xaqooda.

XAARAANTA OO LA CUNO

Qofkii aan Ilaahay ka baqeyn dan kamalaha
meeshii uu xoolo ka kasbayo iyo meeshii uu ku
bixinayo, balse hamigiisu waa siduu u siyaadin
lahaa kaydkiiisa xaraan ama booliba ha
ahaadee, kaas oo uu ku keenay xadid ama
laaluush ama booli ama is daba marin ama iib
xaaraan ah, ama ribo ama xoolo agoomeed
ama shaqo xaaraan ah, wuxuu ka kasbay
caraafeysi, macsi, heesaha, ama inuu ku xad
gudbo bangiga muslimiinta iyo xoolaha dad
weynaha ama dadka xoolahooda oo shaxaad
lagu qaato, ama baryo aan baahi u heyn iyo
wixii la mid ah, ka dibna uu cuno, labisto oo
gaadiid ka fuulayo, oo guri ka dhistay ijaarto,
alaabo guri ka gato kaasi calooshiisa wuxuu
galinayaa xaaraan, Nabiguna (scw) wuxuu yiri:

(كل لحم نبت من سحت فالنار أولى به) رواه الطبرانی.
 Maalinta qiyaame waxaa la weydiinayaa xoolihiisa meesha uu ka kasbay iyo wixii uu ku bixiyey, markaas ayey imaanaysaa halaagu iyo khasaaradu, qofkii xoolo booli ah heysta waxaa ku waajib ah inuu u deg dego sidii uu isaga saari lahaa, hadday yihiin xaq qof kale leeyahayna ha u deg dego sidii uu u celin lahaa isga oo weydiisanaya inuu cafiyo inta aan la gaarin maalinta aan la isku kala xukmineyn diinaar iyo dirham midna ee la isku kala xukumaayo xasanaad iyo danbiyo.

KHAMRADA OO LA CABO Dhibicba Haku Ahaatee

Ilaahay wuxuu yiri:

(إنما الخمر والميسر والأنصاب والأزلام رجس من عمل الشيطان فاجتنبوه لعلكم تفلحون) المائدة ٩٠.

Amarka loo adeegsadey ka fogaanta asaga ayaa ah daliilka ugu xoog badan oo tusaya xaaraanimada khamrada waxaa lagu xiriiriyey Ansaab oo ah gaalada Ilaahooda iyo Asnaamtoodii, haddaba xujo uma laabna duulka oranaya Ilaahay ma oran waa xaaraan ee wuxuu yiri ka fogaada (اجتنبوه)

Sunada Nabiganu (scw) waxaa ku soo aroorey goodi ku wajahan qofkii khamrada caba, waxaa laga wariyey Jaabir xadiis Nabiga gaarsan:

(...إن على الله عز وجل عهدا لمن شرب المسكر أن يسقيه من طينة الخبال، قالوا: يا رسول الله وما طينة الخبال؟ قال: عرق أهل النار أو عصارة أهل النار) رواه مسلم.

Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(من مات مدمن خمر لقي الله وهو كعابد الوثن) رواه الطبراني.

Khamrada iyo waxyaalaha lagu saqraamo maanta aad ayey u noocyo bateen oo waxaa tiro batay magacyadoodii carabiga iyo cajamta ahaa, waxay u bixiyeen biira, jumca, kuxuul, caraq, foodka, shambaaniya i.w.m. Ummaddaana waxaa ka soo baxay qoladii Nabigu ku sheegay hadalkiisii:

(ليشربن ناس من أمتي الخمر يسمونها بغير اسمها) رواه أحمد.

Waxay u bixiyeen cabitaanka Ruuxiga, intay oran lahaayeen khamro iyagoo qarín iyo dagid uga jeeda, Ilaahay wuxuu yiri:

(يخادعون الله والذين آمنوا وما يخدعون إلا أنفسهم وما يشعرون) البقرة ٩.

Shareecadu waxay la timid xeer weyn oo lagu soo af jarayo laguna dabar goynayo fitnada isdaba marinta ah, kaa soo ku soo aroorey hadalkii Nabigu yiri (scw) oo ahaa:

(كل مسكر خمر، وكل مسكر حرام) رواه مسلم.

Nabigu wuxuu ka loo yiri:

(ما أسكر كثيره فقليله حرام) رواه أبو داود ٣٦٨١.

wax walbo oo caqliga dooriya oo sakhraamiya intiisa badan iyo intiisa yariba waa xaraan, si walba oo magacyada loo tiro badiyo oo ay u kala duwanaadaan magacu waa iskumid xukunkana waa la yaqaan.

Ugu danbeyntii tani waa waanadii Nabigu ku waaniyey dadka khamrada caba wuxuuna yiri:

(من شرب الخمر وسكر لم تقبل له صلاة أربعين صباحا، وإن مات دخل النار، فإن تاب تاب الله عليه، وإن عاد فشرب فسكر لم تقبل له صلاة أربعين صباحا، فإن مات دخل النار، فإن تاب تاب الله عليه، وإن عاد فشرب فسكر لم تقبل له صلاة أربعين صباحا، فإن مات دخل النار، فإن تاب تاب الله عليه، وإن عاد كان حقا على الله أن يسقيه من ردة الخبال يوم القيامة، قالوا يا رسول الله وما ردة الخبال؟ قال: عصارة أهل النار) رواه ابن ماجه.

Haddii ay sidaa tahay xaaladda dadkii cabayey wixii lagu sakhraamayey, sidee noqoneysaa xaaladda dadka isticmaala waxa ka sii xun oo ah maandooriyaha ama daroogada.

IN LA ISTICMAALO WEELASHA DAHABKA IYO QALINKA AMA WAX LAGU CUNO OO WAX LAGU CABO

Waxay u dhowdahay in meelaha alaabta maacuunta lagu gado aysan ka marnaan weelal dahab iyo qalin ah, ama lagu dheehay dahab iyo qalin, waxaa la mid ah guryaha dadka maalqabeenka ah iyo hoteelada qaarkood, balse weelashaasi waxay ka mid noqdeen waxyaalaha munaasabaadka ay isu hadiyadeeyaan, dadka qaar ayaa laga yaabaa inaysan gurigooda dhigan laakin ay ku isticmaalaan dad kale guryahooda iyo alla barigooda, waxaas oo dhan shareecada ayaa lagu xarimay, Nabigana waxaa ka soo aroorey goodi kulul oo ku wajahan isticmaalida weelashaas, Umu Salama waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(إن الذي يأكل أو يشرب في أنية الفضة والذهب إنما يجر جر في بطنه نار جهنم) رواه مسلم.

Xukunkaa waxaa soo galaya wixii alaab iyo maacuun cunto ah, sida suxuunta, fargeetooyinka, malgacadaha, midiyaha, alaabta martida wax loogu geeyo iyo culbadaha xalwada lagu keeno aroosyada iwm.

Dadka qaar ayaa yiraahda anagu isticmaalimeyno ee qurux ahaan ayaa u dhiganayaa meesha alaabta la saarto oo muraayadaha gadaashooda ah, taasina ma banaana iyadoo jid gooyo lagu sameynayo isticmaalkooda

SHAHAADO SUURKA

Ilaahay wuxuu yiri:

(فاجتنبوا الرجس من الأوثان واجتنبوا قول الزور حنفاء
 لله غير مشركين به) الحج ٣٠-٣١

Cabduraxmaan Bin Abii Bakar (rac) wuxuu ka wariyey aabihi inuu yiri Nabiga anagoo la joogna ayuu yiri:

(ألا أنبئكم بأكبر الكبائر ثلاثا: الإشراف بالله وعقوق
 الوالدين وجلس وكان متكئا فقال: ألا وقول الزور، قال فما
 زال يكررها حتى قلنا ليته سكت) رواه البخارى.

Shahaado suurka ka digidiisa in lagu celceliyo waxaa keenaya dadkii oo sahladay iyo asbaabta keenaysa oo badan, taas oo ay ka mid tahay cadaawadda, xasadka iyo waxa ka ratibmaya oo fasaad badan ah, imisaa xuquuq ayaa ku dhuntay shahaado suur, imisaa dad beri ah shahaado suur sababteed dulmi ugu dhacay, ama dad ku qaateen wax aysan lahayn, ama dad la siiyey abtirsiinyo aysan

lahayn, ayadoo shahaado suur loo tixgaliyey. Shahaado suurka fududeysigiisa waxaa ka mid ah waxa dadka qaarki ku sameeyaan maxkamadaha oo ay ka mid tahay inay ku yiraahdaan qof ay dariiqa isku arkeen markhaati ii noqo aniguna markhaati ayaan kuu noqon, markaas ayuu uga markhaati noqonayaa arin u baahan in laga war qabo xaqiiqda iyo xaaladda, sida inuu uga markhaati noqdo lahaansho guri, ama dhul ama qof cadaynti isaguna uusan ku arag ilinka maxkamadda iyo dariiqa mooyee, taasina waa been abuur waxaana haboon in shahaadadu noqoto sida ku soo aroortay kitaabka Ilaahay

(وما شهدنا إلا بما علمنا) يوسف ٨١.

GITAARKA IYO MUUSIKADA OO LA DHAGEYSTO

Ibnu Mascuud (rac) wuxuu ku dhaaran jiray heesaha in looga jeedo hadalka Ilaahay oo ah:

(ومن الناس من يشتري لهو الحديث ليضل عن سبيل الله)

تفسير ابن كثير ٦/٣٣٣.

waxaa laga wariyey Abuu Caamir iyo Abuu Maalik Al-ashcari in Nabigu yiri:

(ليكونن من أمتي أقوام يستحلون الحر والحرير والخمر والمعازف) رواه البخارى .

Anas waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(ليكونن فى هذه الأمة خسف وقذف ومسح وذلك إذا شربوا الخمر واتخذوا القينات وضربوا المعازف) رواه الترمذي.

Nabiguna wuu reebay gurbaanka oo la tumo, muzmaarkana wuxuu ku sheegay inuu yahay codka qofka axmaqa munaafiqa ah, culumadii hore sida imaan Axmed Allaha u naxariistee waxay sheegeen inay xaaraan tahay qalabka fanka iyo kan wax lagu tumo sida cuudka, turunbada, shabaabadda, rabaabada, iyo sanjiga. waxaan shaki ku jirin qalabka fanka ee cusub inuu soo galayo xadiiska Nabiga (scw) uu ku reebay qalabka wax lagu garaaco, sida kamanka, qaanuunka, organka, bayaanu, giitaarka iyo kuwa kale, balse ayagaa xagga tumida, marqaanka iyo saameynta kaga weyn qalabkii hore ee qadiimka ahaa ee xarimidiisu ku soo aroortay axaadiista Nabiga (scw) qaarkood, balse marqaanka muusikada iyo ku sarqaankeeda ayaa ka weyn ku sarqaanka khamrada, siday sheegeen culumadu sida Ibnul Qayim iyo kuwa kale. waxaan shaki ku jirin inay

xaaraanimadeedu sii adkaaneyso danbiguna sii weynaanayo haddii ay muusakada raacdo heeso iyo luuqadeyn sida codka Qiinaadka oo ah gabdhaha heesa oo fanaaniinta ah, musiibadu waa sii weynaan marka miraha heesuhu noqdaan caashaq iyo jaceyl iyo quruxda dumarka oo la faaleeyo, sidaa awgeed culumadu waxay heesaha ku sheegeen boostada sinada, uuna qalbiga ku beero munaafaqnimo, guud ahaan maanta heesuhu waxay noqdeen fitnooyinka ugu waaweyn ee jira. Waxyaabaha balaayada siyaadiyey maanta waxaa ka mid ah in muusikadii gashay waxyaalo badan sida saacadaha, ganbaieelada, qalabka caruurtu ku ciyaarto, kombuyuutarka, iyo qalabka telefoonka qaarki, in laga fogadana waxay noqotay arrin go'aan u baahan Ilaahay ayaa kaalmo leh.

XANTA

Goleyaal badan oo dadku fariistaan waxaa looga faakiheystaa xanta muslimiinta iyo in wax la yeelo sharaftooda, taasina waa arin Ilaahay ka reebay adoomihiisana ka dalbay inay ka fogaadaan, wuxuuna ku matalay qaab la

nacayo oo naftu ka yaqyaqsanayso Ilaahay wuxuu yiri:

(ولا يغتب بعضكم بعضا يحب أحدكم أن يأكل لحم أخيه ميتا فكرهتموه) الحجرات ١٢.

Nabiguna wuxuu ku caddeeyey macnaha xanta hadalkiisii:

ت) أتدرون ما الغيبة؟ قالوا الله ورسوله أعلم. قال: ذكرك أخاك بما يكره، قيل أفرأيت إن كان في أخي ما أقول؟ قال إن كان فيه ما قول فقد إغتبته وإن لم يكن فيه فقد بهته (رواه مسلم.

Xantu waa inaad muslinka ku sheegto ceeb uu leeyahay oo in lagu sheego uu nacayo, waa isku mid haddii ay yihiin waxa lagu xamanayo wax ku saabsan jirkiisa ama diintiisa ama adduunyadiisa ama naftiisa ama akhlaaqdiisa ama abuuritaankiisa, waxayna leedahay dhowr qaab oo ay ka mid tahay in qofka ceebtiisa la sheego ama si jeesjees ahaana looga sheekeeyo, dadkuna waa iska sahlanyaana arrinta xanta isagoo Ilaahay agtiisa ku leh ficilkaasi foolxumo, taasna waxaa tusinaya hadalkii Nabigu yiri (scw):

(الربا إثتان وسبعون بابا أدناها مثل إتيان الرجل أمه، وإن أربى الربا إستطالة الرجل في عرض أخيه) السلسلة الصحيحة ٢٠٠١/٤.

Waxaa ku waajib ah qofka golaha fadhiya inuu munkarka reebo oo uu difaaco walaalkiisa la xamanayo, Nabiguna arintaa dadka waa jecleysiiyey wuxuuna yiri:

(من رد عن عرض أخيه رد الله عن وجهه النار يوم القيامة) رواه أحمد.

IS KU DIRKA

Arinta ah in dadka hadalka loo kala qaado si la isugu diro weli kama ay suulin inay tahay asbaabta ugu weyn ee keenta in xiriirka la isku jaro oo xiqdiga iyo cadaawada dadka lagu dhex huriyo, falkaas qofkii sameeya Ilaahay waa caayey, Ilaahay wuxuu yiri:

(ولا تطع كل حلاف مهين * هماز مشاء بنميم) القلم ١٠ - ١١

Xudeyfa waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(لا يدخل الجنة قتات) رواه البخارى.

Qataatku waa qofka dadka oo aan ogeyn dhageysta ka dibna xanta, Ibnu Cabaas waxaa laga wariyey inuu yiri Nabigu (scw) wuxuu soo marey beer ka mid ah beeraha Madiina markaas ayuu ka maqlay cod laba qof oo lagu cadaabay qabrigooda, markaasaa Nabigu yiri "waa la cadaabayaa wax weyna lagu cadaabi

maayo, ka dib wuxuu yiri balse waa weyn tahay midkood wuxuu ahaa mid aan kaadida iska duwin, kan kalena xan ayuu la wareegi jirey". Bukhaari ayaa wariyey.

Qaababka xun ee falkan leeyahay waxaa ka mid ah in ninku ku gabood falo xaaskiisa ama taa lidkeeda, taas oo ah mid keeneysa in xiriirkoodu xumaado, taas waxaa la mid ah in shaqaalaha qaarkood ku kacaan inay qaar ka mid ah hadalkooda u gudbiyaan maamulaha ama mas'uulka iyagoo isku dirayo si ay qofkaas dhib u gaarsiyaan, taasna waxay ka mid tahay waxyaalaha la xarimey.

DADKA GURYAHOODA OO IDAN LA'AAN LA DAAWADO

Ilaahay wuxuu yiri:

(يا ايها الذين آمنوا لا تدخلوا بيوتنا غير بيوتكم حتى تستأنسوا وتسلموا على أهلها) النور ٢٧.

Nabiguna (scw) wuxuu yiri isagoo caddeynaya cilladda idan qaadashada inay tahay iyado laga baqayo in la eego dadka guryaha leh cowradooda:

(إنما جعل الاستئذان من أجل البصر) رواه البخارى.

Maantana iyadoo ay jirto in guryuhu isku dhowyihiin, daaruhuna dhinaca isku hayaan, daaqaduhuna isku beegan yihiin waxay aad ugu dhawdahay inay dhicdo in darisku is arko, dad badanina indhahooda malaabaan, waxaaba laga yaabaa in qaarka degan xagga sare ay u qasdaan inay ka soo eegaan daaqadahooda iyo dushooda sare guryaha la deriska ah ee ka hooseeya, taasina waa xaaraan iyo deriska oo xurmadiisa lagu xad gudbey waana dariiq xaaraan lagu gaaro, arintaas sababteeda waxaa ku dhacay fitno iyo balaayo badan, arinta khatarteeda waxaa daliil ugu filan in shareecadu qisaas la'aan ka dhigtay isha qofka fiirsada dadka guryahooda, Rasuulku wuxuu yiri:

(من اطلع في بيت قوم بغير إذنهم فقد حل لهم أن يفتؤوا عينه) رواه مسلم.

Ruwaayad kalena waxay ahayd:

(فتؤوا عينه فلا دية له ولا قصاص) رواه أحمد.

SEDDEX QOF OO LABO KII SEDDEXAAD KA FOQDO

Arintaani waxay ka mid tahay aafada goleyaasha la fariisto ka dhacada iyo talaabooyinka sheydaanka si uu muslimiinta u

kala geeyo oo qalbigooda isugu huriyo, Nabiguna wuxuu yiri isaga oo caddeynaya xukunka iyo cilladdaba:

(إذا كنتم ثلاثة فلا يتناجى رجلان دون الآخر حتى تختلطوا بالناس أجل أن ذلك يحزنه البخارى.

Taas waxaa soo galaya in afar qof seddex kan afaraad ka foqdo iwm, waxaa la mid ah in seddex qof labo ku hadasho luuqad gaar oo kan seddexaad uusan fahmeyn, shakina kuma jiro in ka faqiddu qofka seddexaad ku tahay nooc xaqiraad ah ama ay moodsiineyso inay shar la doonayaan.

ISBAAL (RAGGA OO DHARKA HOOS U DHEEREYSTA)

Waxyaalaha dadku u malaynayo inay fudud yihiin Ilaahay agtiisana ku weyn waxaa ka mid ah isbaalka oo ah dharka oo Raggu hoos u dheereysto gaarsiiyana meel ka hooseysa gomada, qaarna ay dhulka dharkooda taabsiiyaan, qaarna dhulka ayey ku jiidaan. Waxaa laga wariyey Abuu Dar (rac) xadiis Nabiga gaarsan oo ah:

(ثلاثة لا يكلمهم الله يوم القيامة ولا ينظر إليهم ولا يزكهم ولهم عذاب أليم: المسبل (وفى رواية إزاره)

والمنان (وفى رواية: الذى لا يعطى شيئاً إلا منه) والمنفق سلعته بالحلف الكاذب (رواه مسلم.

Qofka oranaya aniga isbaalka maradeydu kibir maha, waa qof naftiisa ku amaaney amaan aan la qaadan karin, goodiga ku soo aroorey musbilkuna waa mid guud ahaaneed ama ha u jeedo kibir ama yuu u jeedine, sida uu tusayo hadalkii Nabigu (scw):

(ما تحت الكعبين من الإزار فى النار) رواه أحمد.

Hadduu marada u dheeraysto faanfaan cuquubbaddii waxay noqon mid daran oo weyn sida ku soo aroorey hadalkii Nabiga (scw):

(من جر ثوبه خيلاء لم ينظر الله إليه يوم القيامة) رواه البخارى.

waayo wuxuu kulmiyey labo shay oo muxaram ah, isbaalkuna muxaram ayuu ku yahay dharka oo dhan sida uu tusayo xadiiskii Ibnu Cumar ee Nabiga gaarsan:

(الإسبال فى الإزار والقميص والعمامة، من جر منها شيئاً خيلاء لم ينظر الله إليه يوم القيامة) رواه أبو داود ٣٥٣/٤.

Qofka dumarka ah waxaa loo ogol yahay inay hoos u raariciso ilaa taako ama dhudhun si ay u asturto gomaadaheeda dadaal ahaan, iyadoo ka baqeyso in dabayshu cowradeeda feydo iyo wixii la mid ah, laakiin mabanaana inay xadkaas dhaafto sida dharka aroosyada, kaasoo dhererkiisu gaarayo taakooyin iyo

dhudhumo waxaaba laga yaabaa in laga daba sido.

RAGGA OO ISKU QURXIYA DAHABKA QAABKII UU DOONO HA NOQDEE

Waxaa laga wariyey Abi Muusaa Alashcari xadiis Nabiga laga wariyey:

(أهل لإناث أمتى الحرير والذهب وحرم على ذكورها)
رواه أحمد.

Suuqyada maanta waxaa yaal qaar ka mid ah waxyaalaha la sameeyey oo ragga loogu tala galey oo ay ka mid yihiin saacadaha, ookiyaalayaasha, guluusyada, qalimaanta, silsiladaha, biladaha oo lagu sameeyey miisaano kaladuwan oo dahab ah, ama dheehid kaamil ah lagu dheehay dahab, waxyaalaha munkarka ah waxaa ka mid ah abaal gudka loogu talo galay tartamada kaarkood sida saacado rag oo dahab ah, Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyey (rac) in Rasuulku arkay far gashi dahab ah oo nin gacanti ku jira markaas ayuu inta ka siibey tuurey oo yiri:

(يعمد أحدكم إلى جمرة من نار فيجعلها في يده؟! فقبل للرجل بعد ما ذهب رسول الله صلى الله عليه وسلم خذ

خاتمك إنتفع به. قال: لا والله لا آخذه أبدا وقد طرحه رسول الله صلى الله عليه وسلم) رواه مسلم.

IN DUMARKU LABISTO DHAR GAABAN, KHAFIIF AH, OO CIRIIRI AH

Waxaa ka mid ah waxyaalaha cadowgeenu nagula soo duulay maanta dharka iyo moodooyinka ay dajiyeen qaababkeeda iyo tolmooyinkeeda laguna dhex faafiyey muslimiinta dhexdooda, dharkaas oo aan cowro astureyn gaabnidiisa ama khafiifnimadiisa ama ciriirinimadiisa, qaar badan oo ka mid ah ma banaana in la labisto xataa dumarka dhexdooda iyo maxaarimta hortooda, Nabiguna wuu inoo sheegey inay aakhirusamaanka soo bixi doonaan noocyo labiska ka mid ah oo dumarku xirtaan, sida ku soo aroortey xadiiskii Abuu Hureyra oo Nabiga (scw) gaarsan:

(صنفان من أهل النار لم أرهما: قوم معهم سياط كأذناب البقر يضربون بها الناس، ونساء كاسيات عاريات مميلات مائلات رؤوسهن كأسنمت البخت المائلة، لا يدخلن الجنة ولا يجدن ريحها وإن ريحها ليوجد من مسيرة كذا وكذا) رواه مسلم.

waxaa soo galaya labiskaas midkay labistaan dumarka qaarkood oo ah kan dhinaca hoose in

dheer ka furan ama dhowr dhinac ka jeexan, hadday fariisato waxaa muuqanaya cawradooda, iyadoo ay jirto isu ekeysiiinta gaalada iyo ku raacida moodooyinka iyo waxay keenaan oo dhar fadeexad leh ah, Ilaahay ayaan nabad gelyo weydiisaneynaa, waxyaalaha khatarta ah waxaa ka mid ah sawirada xun ee dharka qaarki ku yaal, sida sawirada kuwa heesa, kooxo muusikada tuma, quraarado khamro ah iyo sawirada waxyaabaha nool ee shareecada ku xaaraanta ah ama calaamadda kirishtada ah ama hal ku dhigyo ay leeyihiin kooxo iyo ururo xun, ama oraah liidata oo sharafta iyo dhowrsanida wax u dhimeysa, taasoo badanaaba ku qoran af qalaad.

RAGGA AMA DUMARKA OO TIMAHOODA KU XIRIIRIYA TIMO AADANE AMA CID KALE

Waxaa laga wariyey Asmaa' Bintu Abii Bakar inay tiri: qof dumar ah ayaa Nabiga u timid waxay ku tiri Rasuulkii Ilaahayow waxaan leeyahay gabar aroos ah waxaa ku dhacay cudurka jadeecada markaasaa timihii ka

daateen ee timo kale ma ugu xiriiriyaa?
Markaasaa Nabigu yiri:

(لعن الله الواصلة والمستوصلة)

Jaabir Bin Cabdullaahi waxaa laga wariyey inuu
yiri:

(زجر النبي صلى الله عليه وسلم أن تصل المرأة
برأسها شيئاً) رواه مسلم.

Taas masalkeeda waxaa ka mid ah waxa
maanta loo yaqaan buruukada waasilaatkuna
waa (dumarka timaha xiriirya) maanta waxaa ka
mid ah waasilaatka koofeerada iyo waxay soo
bandhigayaan oo munkarka ah.

Falkaa la xarimay matalkiisa waxaa kale oo ka
mid ah labisashada timaha buruukada sida ay
sameeyaan kuwa aan akhlaaqda lahayn
qaarkood oo ay ka mid yihiin ragga iyo dumarka
jila filimada iyo ruwaayadaha.

RAGGA OO DUMARKA ISU EKEYSIIYA IYO DUMARKA OO RAGGA ISU EKEYSIIYA XAGGA DHARKA , HADALKA IYO QAABKA

Fidrada Ilaahay u jideeyey adoomihiisa waxaa
ka mid ah in raggu ilaaliyaan ragnimada Ilaahay
ku abuurey, dumarkuna ilaaliyaan
dumarnimada Ilaahay ku abuurey, taasna waa

asbaabta la'aanteed aysan nolosha dadku hagaageyn, in raggu dumarka isu ekeysiiyaan ama dumarku ragga isu ekeysiiyaan waa arrin khilaafsan fidrada, albaab fasaadsna fureysa diin la'aana fidineysa, falkaas xukunkiisu sharci ahaan waa xaaraan, naska sharciga ah haddii ay ku soo aroorto lacnad la lacnadayo qofkii falkaas sameeya waxay tuseysaa arinkaa xaaraanimadiisa iyo inuu ka mid yahay danbiyada waaweyn (kabaa'irta). Waxaa laga wariyey Ibnu Cabbaas xadiis Nabiga gaarsan:

(لعن رسول الله المتشبهين من الرجال بالنساء
والمتشبهات من النساء بالرجال) رواه البخارى.

Isu ekeysiiintu waxay noqon kartaa xagga dhaqdhaqaaqa, degenaanta, socodka, jirka oo labeeshe laga dhigo, hadalka iyo socodka oo la naageeyo. Isu ekaantu waxay kaloo ka imaan kartaa xagga labiska, oo ninka uma banaana inuu xirto silsilado ama jijimo, dugaagadaha lugaha, ama dhegodhego iyo wixii la mid ah, siday ugu faafsan tahay dadkaan la yiraahdo hebiska iyo nimow naageeshka iyo wixii la mid ah, sidoo kale uma banaana qofta dumarka ah inay xirato dharka raggu xirto sida khamiiska, shaarka iyo wixii la mid ah, balse waxaa waajib ah inay qaabka iyo tolmadaba ku khilaafto ragga, inay waajib tahay

in labada jinsi midba mid kale khilaafo waxaa u daliil ah xadiiska laga wariyey Abii Hureyra (rac) oo Nabiga gaarsan:

(لعن الله الرجل يلبس لبسة المرأة ، والمرأة لبسة الرجل) رواه أبو داود.

TIMAHA OO MADOW LAGU ASLO

Waxaa sax ah in falkaas lagu xarimay goodiga lagu sheegey hadalkii Nabigu yiri:

(يكون قوم يخضبون آخر الزمان بالسواد كحواصل الحمام لا يريحون رائحة الجنة) رواه أبو داود.

Falkaasi wuxuu ku dhex faafey dadka ciradu ka soo baxday, cirada waxay ku bedelaan inay mariyaan madow, falkaasi wuxuu keenayaa fasaad uu ka mid yahay dagid iyo inuu qariyo abuurta Ilaahay iyo inuu u muuqdo xaalad aan xaaladiisa runta ah ahayn, shakina kuma jiro intaasi raad ku yeelanayso suluuga qofka, waxaaba ka imaan karta in lagu kadsoomo, Nabiga waxaa ka soo aroorey inuu cirada ku doorin jirey xinaha iyo wixii la mid ah oo guduud ama booraboorow ku jiro ama wixii u dhow Nabiga midabkiisa, markii loo keenay Abii Quxaafa maalintii Maka la furay oo madaxiisa iyo garkiisa xoosh cad yihiin wuxuu ku yiri:

(غيروا هذا الشيب واجتنبوا السواد) رواه مسلم.

Waxaa sax ah in naagtu ninka la mid tahay oo aysan u banaanayn inay timaheeda aan madoobayn ay madow mariso.

IN WIXII NOOLE AH LAGU SAWIRO DHARKA, GIDAARKA, WARQADAHA IYO WIXII LA MIDA

Cabdullaahi Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(إن أشد الناس عذابا عند الله يوم القيامة المصورون)
رواه البخارى.

Abii Hureyrana waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan: Ilaahay wuxuu yiri:

(ومن أظلم ممن ذهب يخلق كخلقى فليخلقوا حبة وليخلقوا ذرة)
رواه البخارى.

Ibnu Cabbaasna waxaa laga wariyey Xadiis Nabiga gaarsan:

(كل مصور فى النار، يجعل له بكل صورة صورها نفسا فتعذب فى جهنم) قال ابن عباس: إن كنت لا بد فاعلا فاصنع الشجرة وما لا روح فيه)
رواه مسلم.

Axaadiistani waxay tuseysaa inay xaaraan tahay in la sawiro wax noole ah oo aadane ah ama xayawaan kale ah, hoos ha lahaadeen ama yuu lahaanine, waa isku mid haddii sawiradu yihiin kuwa la daabacay ama la

sawiray ama la qoday ama la naqshadeeyey ama la qoray ama la shubay iwm. Axaadiista sawiraada xarimaysa waxaas oo dhan way soo wada galayaan, qofka muslimka ahina waa inuu u hogaansamaa nusuusta sharciga ah waan in uusan ku doodin oo oran: Anigu sawirka caabudimaayo una sujuudi maayo haddii uu qofka wax garadka ah eego oo u dhaba galo hal xumaana oo faafida sawirku keenayso maanta, wax ayuu ka garan lahaa xikmada ay shareecadu ka leedahay markii ay xarrimtay sawirka, taasoo keentay waxyaalaha jira oo xumaanta waa weyn ah oo ay ka mid tahay dadka shahwada Ilaahay ku abuurey oo la kiciyo oo la dhaqaajiyo, balse waxay sababtay in la gaaro in macsi lagu dhaco, qofka muslimka ah waxaa ku haboon inuusan gurugiisa dhigin wax sawiro nafle ah si aysan sabab ugu noqon in gurugiisa aysan Malaa'iktu soo galin, Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(لا تدخل الملائكة بيوتا فيه كلب ولا تصاوير)

cirada guryaha qaarkood waxaa yaal sawiro la qorey oo qaarkood gaaladu waxay caabudaan ah guryaha ayaa loo dhigtaa tuxfad ahaan iyo quxux ahaan taas xaaraanimadeedu kuwa kale ka sii daran, sidoo kale sawirada gidaarada la suro waa ka daran yihiin kuwa aan la surayn, imisa jeer ayay xumaan weyn keentay, imisa

jeer ayey tiiraanyo soo noolaysay, imisa jeer ayey isu faanid keentay, lama oran karo sawirku waa xusuus waayo xusuusta dhabta ah qalbiga ayaa loogu hayaa qofka qaaliga ah ama qaraabada ah oo muslimka ah, waxaana loogu duceeyaa danbi dhaaf iyo naxariis, haddaba waxaa haboon in la bixiyo sawirada oo dhan ama la baabi'yo, wixii in la suuliyo ay adag tahay mooyee oo dhib ku jiro sida sawirada sida ba'an u faafey oo ku dhegan culbadaha iyo sawirada ku yaal qaamuusyada, maraajicda iyo kutubta laga faa'iideysto, iyada oo lagu dadaalayo in la suuliyo markii ay suuro gasho lagana digtoonaado sawirada xun, sidoo kale waxaa la haysan karaa sawirada baahida loo qabo sida kuwa ku dhagan teesarayaasha qofku sito, culumada qaarkoodna waxay baneeyeen sawirada la ihaanaysto sida kuwa la isku taago

(اتقوا الله ما استطعتم)

RIYADA OO LAGA BEEN SHEEGO

Dadka qaar ayaa waxay been abuuraan riyo iyo manaam aysan arag si ay dadka dhexdiisa ugu yeeshaan fadli dheeraad ah ama xurmo ama uu u helo nafac iyo xoolo ama inuu ku cabsi geliyo

qof kale oo ay cadaawad ka dhaxayso iwm. Dad kale oo caamada ah qaarki wax kale ayay ka aaminsan yihiin manaamka waana ku dhagan yihiin, marka beentaas ayaa lagu khayaanayaa, goodi aad u daran ayaa ku soo aroorey qofkii falkaas sameeya Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(إن من أعظم الفري أن يدعى الرجل إلى غير أبيه، أو يُرى عينه ما لم تر ويقول على رسول الله صلى الله عليه وسلم ما لم يقل) رواه البخارى.

Wuxuu kaloo yiri Nabigu (scw):

(من تحلم بحلم لم يره كلف أن يعقد بين شعيرتين ولن يفعل) رواه البخارى.

Qofka falkaas la yimaada waxaa lagu kalifaa inuu labo xabo oo qamadi ah isku xiro, labo xabo oo qamadi ahna in la isku xiro waa arin aan suuro gal ahayn, markaa falkii uu la yimid oo kale ayaa lagu ciqaabay.

QABRIGA OO LAGU FARIISTO AMA LAGU ISTAAGO AMA LOO KORTAGO

Waxaa laga wariyey Abu Hureyra inuu yiri Rasuulku (scw) wuxuu yiri:

(لأن يجلس أحدكم على جمرة فتحرق ثيابه فتخلص إلى جلده خير له من أن يجلس على قبر) رواه مسلم.

Qabriga oo lagu istaago waxaa sameeya dadka qaarki markay aasayaan qofka ka dhinta dan kama laha inay qubuurta kale ku istaagaan marmar kabaha ayey kula istaagaan qubuurta dariska ah iyagoon ixtiraamayn maydadka kale, arintaa weynanka ay leedahay Rasuulku wuxuu ka yiri:

(لأن أمشى على جمرة أو سيف أو أخصف نعلی برجلی أحب إليّ من أن أمشى على قبر مسلم) رواه ابن ماجه.

sidee noqonayaa qofka xoogaya dhulka qabrigu ku yaal oo ka dhisaya mashruuc ganacsi ama deegaan. Qubuuraha in loo kor tago oo lagu xaajo guto waxaa sameeya dad aan wanaagsaneyn, oo haddii xaajo qabto oo uu damco inuu xaajo guto wuxuu ka boodaa gidaarka qubuurta ama wuu galaa markaas ayuu ku dhibaa dadka dhintay qurunkiisa iyo najaasadiisa, Nabiguna (scw) wuxuu yiri:

(وما أبالي أوسط القبر قضيت حاجتي أو وسط السوق) رواه ابن ماجه.

yacni, in qabri lagu xaajo guto foolxumadeedu waxay la mid tahay in dadka hortooda oo suuqa ah cawrada lagu fayto oo lagu xaajo guto, qolada qashinka iyo qurunka ku tuurta qubuurta gaar ahaan kuwa laga guuray oo gidaakoodii jajabay goodigaas wax ayay ku leeyihiin, aadaabta la iska doonayo marka qubuurta la

siyaaranayo waxaa ka mid ah in kabaha la siibo marka la doonayo in qubuurta lagu dhex socdo..

KAADIDA OO AAN LA ISKA DUWIN

Waxyaalaha ay shareecadaanu ku fiican tahay waxaa ka mid ah inay la timid wax walba oo qofka xaalkiisu ku wanaagsanaanayo, taas waxaa ka mid ah in najaasada la iska suuliyo, sidaas awgeed ayaa la jideeyey istinjada iyo istijmaarka waana la cadeeyey qaabka la isu nadiifinayo, dadka qaar ayaa fududaysta najaasadda suulinteeda, taasina waxay u keentaa inay wasakhoobaan dharkoodii ama jirkoodii, taasina waxay keentaa in salaadoodii ansixi weydo Nabiguna wuxuu sheegay in falkaasi ka mid yahay sababta cadaabta qabriga, Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyey inuu yiri Nabiga (scw) ayaa soo marey beer ka mid ah beeraha Madiina markaas ayuu maqlay labo qof 'oo lagu cadaabay qabrigooda codkuud markaasuu yiri:

(يعذبان وما يعذبان في كبير، ثم قال: بلى (وفى رواية: وانه لكبير) كان أحدهما لا يستتر من بوله وكان الآخر يمشى بالنميمة) رواه البخارى.

Balse Nabigu wuxuu sheegay in cadaabta qabriga badankeedu kaadida ka timaado, kaadida iska duwid la'aanteeda waxaa soo galaya qofka xaajo gudashada degdeg uga istaagaya inta aan kaadidu ka dhamaan ama ku kaadiya xaalad ama meel kaadida ku soo celinaysa, ama inuu ka tago istinjada iyo istijmaarka ama uusan danayn, isu ekeynta gaalada maanta waxay gaartay in suuliyada (musqulaha) qaarkood ay leeyihiin meelo lagu xaajo guto oo gidaarka ku dhegan iyadoo iska muuqata, qofka ayaa imaanaya oo si xishood rado ah ugu kaleetiyaya dadka soo galaya iyo kuwa baxaya hortooda, ka dibna maradiisa ayuu kor u qaadan oo najaasadii ku labisan, markaa wuxuu noqonayaa mid kulmiyey laba arimood oo xaaraan fool xun ah tan hore waa inuu cawradiisa dadka aragooda ka ilaashan waayey tan labaadna waa inuusan kaadidii iska ilaalin iskana dhammeyn.

IN LA DHAGEYSTO DAD SHEEKEYSANAYA SHEEKADOOD IYAGA OO NACAYA

Ilaahay wuxuu yiri:

(ولا تجسسوا) الحجرات ١١ .

Ibnu Cabbaas waxaa laga warieye xadiis Nabiga gaarsan:

(من استمع إلى حديث قوم وهم له كارهون صب في أذنيه الآنك يوم القيامة) رواه الطبراني.

hadduu warkooda gudbinayo iyagoon ogeyn si uu dhib u gaarsiiyo, danbigii jaasuusnimada wuxuu ku darsaday danbi kale isaga oo soo galaya xadiiskii Nabigu (scw) yiri:

(لا يدخل الجنة قنات) رواه البخارى.

Qataat waa qofka dadka warkooda dhageysta iyagoon dareemayn ka dibna gudbiya.

DARIS XUMADA

Ilaahay kitaabkiisa wuxuu inoogu dardaarmay dariska:

(واعبدوا الله ولا تشركوا به شيئاً وبالوالدين إحساناً وبذى القربى واليتامى والمساكين والجار ذى القربى والجار الجنب والصاحب بالجنب وابن السبيل وما ملكت أيمانكم إن الله لا يحب من كان مختالاً فخوراً) النساء ٣٦.

Dariska in la dhibo waxay ka mid tahay muxarramaadka waaweyn xaqiisa waynankiisa awgeed, Abii Shurayx waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(والله لا يؤمن والله لا يؤمن والله لا يؤمن قيل من يا رسول الله؟ قال الذى لا يأمن جاره بوائقه) رواه البخارى.

Amaanta darisku dariskiisa amaano ama cayda uu caayo Nabigu wuxuu qiyaas uga dhigay daris wanaaginta ama daris xumaynta, Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey inuu yiri " nin ayaa Nabiga ku yiri Rasuulkii Ilaahayow sidee ku ogaadaa inaan wanaag falay, Nabigu wuxuu ku yiri: "haddii aad maqasho dariskaaga oo leh waad wanaajisey, wanaag ayaad samaysay, haddaad maqashidna iyagoo leh xumaan ayaad fashayn, xumaan ayaad fashay ".

Dariska dhibidiisu waxay leedahay dhawr qaab oo kala duwan waxaa ka mid ah in loo diido inuu loox ku muto gidaarka aad wadaagtaan, ama in dhismo kor loo qaado oo la dulkeeno oo laga qariyo qoraxda ama hawada idan la'aanti ama in gurigiisa daaqadaha lagu furo si loo eego cawradiisa, ama in qaylo lagu dhibo sida garaacid iyo dhawaaq waqtiga hurdada iyo waqtiga la nasanayo, ama in carruurta laga dilo iyo in qashinka lagu daadiyo albaabkiisa, Danbigu waa weynaanayaa cigaabtuna waa sii laban laabmaysaa haddii danbi laga galo dariska dhaw Nabigu (scw) wuxuu yiri:

(لأن يزني الرجل بعشر نسوة أيسر له من أن يزني
بامرأة جاره لأن يسرق الرجل من عشرة أبيات أيسر له
من أن يسرق من بيت جاره) رواه البخاري.

Khaa'iniinta qaarkood waxay ka faa'iidaystaan qofka dariskooda ah habeenka uu maqan yahay oo shaqada ku qoran yahay markaasay gurigiisa galayaan oo fasaadinayaan cadaab kulul ayey leeyihiin maalinta qiyaame.

DARDAARANKA OO LA ISKU DHIBO

Xeerarka shareecada waxaa ka mid ah inaad dhib geysan adna aan lagu dhibin, taas matalkeeda waxaa ka mid ah in la dhibo dadkii dhaxalka sharciga ah lahaa ama qaarkood, qofkii falkaas la yimaada waxaa loogu goodiyeey hadalkii Nabigu (scw) yiri:

(من ضار أضر الله به، ومن شاق شق الله عليه) رواه أحمد.

qaabka dardaaranka la isugu dhibo waxaa ka mid ah in qof dadka dhaxalka sharciga lahaa loo diido xaqiisa, ama in loo dardaarmo qof dadka wax dhaxlaya ah in ka badan wixii shareecadu siisay, ama loo dardaarmo in ka badan seddex meelood meel, meelaha aysan dadku hoos joogin dowlad shareecada wax ku kala xukminaysa way ku adkaanaysaa qofku inuu qaato xaqiisii Ilaahay siiyey, sababna ay u tahay maxkamadaha ku dhaqma xukunka la dejiyey oo khilaafsan sharciga Ilaahay, taasoo

faraysa in la fuliyo dardaaranka aan caddaalada ahayn ee Abuukaataha agtiisa lagu qorey, gacantoodu waxay qortay halaag ayey ku mutaysteen halaagna way shaqaysanayaan

NARADKA (WARBAC) OO LA CIYAARO

Waxay ka kooban yihiin ciyaaro badan oo faafay oo dadku isticmaalo waxyaalo xaaraan ah taas waxaa ka mid ah ciyaarta loo yaqaan Naradka ama warbaca (suhar) taas oo ciyaarteedu tahay rarid iyo dhaqaajin lagu sameeyo ciyaaro badan sida tan miiska iyo wixii la mid ah, Nabiguna waa ka digay naradkaa oo furaya albaabada qamaarka iyo turubka, Nabigu wuxuu yiri:

(من لعب بالنرد فكأنما صبغ يده في لحم خنزير ودمه..)
رواه مسلم.

Abii Muusaa waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(من لعب بالنرد فقد عصى الله ورسوله) رواه أحمد.

MU'MINKA AMA CID AAN MUTEYSAN OO LA LACNADO

Dad badan ayaan carrabkooda qaban karin hadday caroodaan waxay ku degdegayaan lacnada, markaasay waxay lacnadaan dadka, xayawaanka, dhirta, maalmaha iyo saacadaha, balse waxaa laga yaabaa inay lacnadaan naftooda iyo carruurtooda, iyo in ninku naagtiisa lacnado ama lidkeeda, taasina waa arrin munkar ah oo khatar ah, waxaa laga wariyey Abii Zayd Thaabit Binu Addaxaak Al-Ansaari (rac) xadiis Nabiga gaarsan:

(..ومن لعن مؤمنا فهو كقتله) رواه البخارى.

Lacnadda oo dumarku aad u isticmaalaan Nabigu wuxuu caddeeyey inay ka mid tahay sababaha ay naarta ku galayaan, sidoo kale dadka wax lacnada Aakhiro ma noqonayaan kuwa shafeeca, waxaa ka khatarsan in lacnadu ku soo noqonayso qofkii ay ka soo baxday haddii uu dulmi ahaan ugu dhawaaqay markaas ayuu ahaanayaa qof naftiisa ku habaaray in Ilaahay cayriyo oo ka dheereeyo naxariistiisa.

BAROOR DIIQA

Waxyaalaha munkarka waaweyn ah waxaa ka mid ah waxa dumarka qaarki sameeyaan oo ah inay kor u qeyliyaan, iyagoo maydka amaanaya waxaa kaloo ka mid ah inay marada jeexaan, inay wajiga iska dharbaaxaan iyo inay timaha xiiraan ama inay isku xiraan timaha oo jaraan, waxaas oo dhan waxay ku tusaysaa inaan laga raali ahayn qadarta Ilaahay, iyo inaan musiibada lagu sabrayn, Nabigu waa lacnaday qofkii falkaa la yimaada Abii Umaama (rac) waxaa laga wariyey in Nabigu (scw) uu lacnaday qofka dumarka ah ee wajiga iska xagata, tan jeebka iska jeexda iyo tan ku ducaysata hooga iyo halaaga. Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(ليس منا من لطم الخدود وشق الجيوب ودعا وبدعوى
الجاهلية) رواه البخارى.

Nabigu wuxuu kaloo yiri:

(النائحة إذا لم تتب قبل موتها تقام يوم القيامة وعليها
سربال من قطران ودرع من جرب) رواه مسلم.

WAJIGA OO LA ISKU DHUFTO AMA WAJIGA OO LA SUNTO

Jaabir waxaa laga wariyey inuu yiri "Nabigu wuu reebay in qof wajiga lagu dhufto ama xoolaha wajiga laga sunto".

Qofka oo wajiga lagu dhufto, aabayaasha iyo macallimiin badan ah ayaa markay carruurta ciqaabayaan wajiga waxay kaga dhuftaan dharbaaxo iyo wax la mid ah, sidaas oo kale dadka qaar ayaa ku sameeya shaqaalahooda iyadoo taasi ku jirto xumaan la xumaynayo wajigii Ilaahay dadka ku karaameeyey, ayaa haddana waxay keenikartaa in dareemayaasha wajiga ku aruursan qaar ka mid ah uu beelo oo ay timaado shalayto, waxaaba dhici karta in loo qabsado qisaas, Xoolaha wajiga laga sunto, waa calaamad gaar ah oo qofka xoolaha leh xoolihiisa ku aqoonsado ama si loogu soo celiyo haddii ay ka dhumaan, falkaasina waa xaaraan waxaana ku jira doorin iyo ciqaabid, haddii dadka qaar xujo ka dhigtaan in sumadaasi calaamad gaar ah u tahay qabiilkooda waxay yeeli karaan inay sumada ku dhigtaan meel aan wajiga ahayn.

QOFKA MUSLIMKA AH OO LA GOOYO WAX KA BADAN SEDDEX BERI SABAB SHARCI AH LA'AANTEED

Shaydaanka talaabooyinkiisa waxaa ka mid ah in muslimiinta uu dhexdhigo inay is gooyaan, in badan oo dadkaas ka mid ah waxay raaceen talaabooyinka Shaydaanka waxayna ku goynayaan walaalahooda muslimiinta ah asbaab aan sharci ahayn, xoolo ayaa la isku khilaafi ama meel xum ayaa la kala istaagi, markaas ayaa is goyntii soconaysaa sanooyin waxaa laga yaabaa inuu ku dhaarto inuusan la hadlin oo uu ku nidro inuusan gurigiisa galin, hadduu dariiqa kula kulmana wuu ka jeensan, hadduu gole la fadhiyo ugu yimaadana qofka ka horeeya iyo kan ka danbeeya ayuu salaamayaa isagana wuu ka talaabsan, taasina waxay ka mid tahay asbaabta daciifisa dad weynaha muslimka ah, sidaa awgeed arintaas xukunkeedu waa mid go'an, goodigeeduna wuu daran yahay Abii Hureyra waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(لا يحل لمسلم أن يهجر أخاه فوق ثلاث فمن هجر فوق ثلاث فمات دخل النار) رواه أبو داود.

Abii Kharaash Al-Aslami waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(من هجر أخاه سنة فهو بسفك لمة) رواه البخارى.

In muslimiintu isgooyaan xumaan waxaa ugu filan in laga reebo danbi dhaafka Ilaahay, Abii Hureyra waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(تعرض أعمال الناس فى كل جمعة مرتين، يوم الإثنين ويوم الخميس، فيغفر لكل عبد مؤمن إلا عبداً بينه وبين أخيه شحنة فيقال: أتركوا أو أركوا) (يعنى أخوا) هذين حتى يفيتاً) رواه مسلم.

labada qof ee isu caraysan haddii mid Ilaahay u toobad keeno waxaa laga doonayaa inuu kii kale u tago oo salaan ku bilaabo, haddii uu sidaas falo oo kii kale ka diido kii salaanta bilaabay waa beri noqday danbigiina wuxuu ku harayaa kii slaanta diiday, Abii Ayuub waxaa laga wariyey xadiis Nabiga gaarsan:

(لا يحل لرجل أن يهجر أخاه فوق ثلاث ليال، يلتقيان فيعرض هذا ويعرض هذا وخيرهما الذى يبدأ بالسلام) رواه البخارى.

Haddiise goyntu tahay sabab sharci ah sida salaadda oo uu ka tago, ama macsi uu ku dhagan yahay, haddii goyntu u faa'iideynayso qofka gafsan oo uu wanaaga ugu soo laabanayo ama ay xumaanta xusuusinayso, goyntu waajib ayey noqon, haddiise dambiluhu uusan ka siyaadsanayn fogaan, cararid iyo

cinaad mooyee, oo uu danbi uun kororsanayo, markaas goyntu ma soconayso waayo wax maslaxad sharci ah keeni mayso, balse waxay siyaadinaysaa fasaad uun, markaa waxa waajib ah in la joojteeyo ixsaanka, waanada iyo xusuusta, sidii Nabigu u gooyay Kacab Binu Maalik iyo labadiisii saaxiib markuu arkay inay maslaxadi ku jirto, isla markaana uusan goyn Cabdullaahi Binu Saluul iyo munaafiqiintii, waayo maslaxaddu inaan la goyn ayay ku jirtey ugu danbeyntii intaas ayaa ii fududaatay inaan ka aruuriyo Muxarramaadka dadka ku dhex faafey.

نسال الله سبحانه وتعالى بأسمائه الحسنى أن يقسم لنا من خشيته ما يحول بيننا وبين معاصيه، ومن طاعته ما يبلغنا به جنته، وأن يغفر لنا ذنوبنا وإسرافنا في أمرنا، وأن يغنيننا بحلاله عن حرامه، وبفضله عن سواه، وأن يتقبلنا توبتنا، ويغسل حوبتنا، إنه سميع مجيب، وصلى الله وسلم على النبي الأمي محمد وآله وصحبه أجمعين والحمد لله رب العالمين .